Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya
Guddiga Qaranka ee Gurmadka
Fatahaadda Webiyada & Roobabka
MUQDISHO - 1981



# FATAHAADDA WEBIYADA & ROOBABKA
## GU'GII 1981


---oOo---

122

# FATAHAADDA WEBIYADA & ROOBABKA
# GU'GII 1981

---oOo---

Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya
Guddiga Qaranka ee Gurmadka
Fatahaadda Webiyada & Roobabka
MUQDISHO - 1981



*Xoghayaha Guud X.H.K.S.*
*Madaxweynaha J.D.S*
*Jaalle Maxamed Siyaad Barre*

# TUSMADA


1. Hordhac .......................................... I
2. Cimilada Soomaaliya ................................ 1
3. Webiyada Soomaaliya ................................ 3
4. Fatahaaddii Webiyada iyo Roobabka, Gugii 1981 .. 6
5. Gobolladii ay Webiyadu ku Fataheen ........... 10
6. Qaabkii Waxyeellada iyo Khasaarihii ........... 14
7. Xaaladdii Dadkii ay Daadadku waxyeelleeyen .... 18
8. La Dagaallankii Dhibaatada Daadadka ........... 25
9. Qiimayntii ...................................... 37
10. Gargaarkii Gurmad ............................ 59
11. Talooyin ...................................... 66
12. Shaxo ........................................ 71

# HORDHAC

Sannaddadii yaraa ee Kacaankii 21kii Oktoobar 1969kii ka hanaqaaday dalka JDS, maamulkana majaraha u hayey, ayaa waxaa shacbiga Soomaaliyeed soo food-saaray masiibooyin aan yarayn oo mid waliba lahayd culaskeeda gaar ahaaneed.

Macnuhuna ma aha sannadihii Kacaanku jiray oo keli ah ayey masiibooyinkaasi ku yimaadeen Shacbiga Soomaaliyeed ,ee waxaa la fac ahaa Kacaanka u adeegidda, daryeelka, tixgelinta, dareemidda iyo ka damqashada dhibaato kasta oo ku timaadda shacbiga Soomaaliyeed meel uu joogaba, arrimahaas ayaana u sabab ahaa dhalashadii Kacaankii Oktoobar. Waxaana munaasibooyinkaas idilkood oo isugu jiray kuwo kaga yimid dalka dabeecadda iyo dadba lagaga guuleystay dagaal isku duubani dawlad iyo dadweyne ah iyo kaalmo laga helay dalal Soomaaliya saaxiib la ah.

Masiibooyinkii isdaba-joogga ahaa ee soo foodsaaray dalka JDS, intii uu Kacaanku jiray, lagana guuleystay, waxaa ka mid ahaa: Duufaan, daacuun, bacaad-celin, abaar, dagaal, qaxooti iyo kii ugu dambeeyey ee ahaa daadadkii ka dhashay fatahaaddii webiyada iyo roobabka (Gugii 1981).

Daadadkaasi waxay si ba'an oo qayri-caadi ah ugu butaaceen Gobollada ay labada Webi maraan, waxaana halkaas ka soo if-baxay khasaarooyin aad u lixaad leh. Waxay fatahaaddaasi jirridaha u bixisay beerihii gobollada daadadku ku butaaceen ka aarmay, ahaana beero si aad ah loogu hanweynaa. Waxaa daadadku xaaqeen dhismayaal, waxaana cayrnimo iyo hoy la'aan isu soo taagay kumaankun qoys, marnaba dadkaasi ma rajo go'in, iyagoo waayihii Kacaanka waayo'arag u noqday gurmad dawladeed iyo isgarab-taag shacab.

dawladda Soomaaliyeed tallaabo-tallaabo ayey ula socotay fatahaadda webiyada iyo roobabkii siyaadada ahaa ee isku bixiska u da'ayey, kuwaas oo sii siyaadinayey dhibaatada, aadna u adkeeyey kaalmadii la gaarsiin lahaa dadkii go'doomay, waxaana aad u xoogaystay kala go'ii isgaarsiineed ee uu dadku lahaa.

Sidaa darteed, Madaxweynaha JDS, Jaalle Maxamed Siyaad Barre, markii uu arkay dhibaatadu in ay ka weyn tahay in lagula dagaallamo heer degmo ama gobol, uuna xaqiiqsaday in ay dhibaatadu tahay mid sii xoogeysanaysa, ayuu bishii Maarso 3dii 1981kii dhisay Guddi heer Qaran ah oo wax ka qabta dhibaatadaas.

Guddigaas oo lagu magacaabay «GUDDIGA QARANKA EE GURMADKA FATAHAADDA WEBIYADA IYO ROOBABKA».

Guddigaas Sare ee Gurmadku wuxuu u hawlgalay si hagar la'aan iyo naf-hurid ah. Wuxuu yididdiilo nololeed oo lagu farxo u noqday shacabkii cidlada ku go'doomay (meelo godan), ayna wehelka u noqdeen biyo-joogga dadka waaweyn qoorta u gaaray, roob habeen iyo maalinba dusha ka hareeyey, dhaxan, kaneeco, bahal hoose, gaajo, iwm.

Si kastaba suuragal ha ugu noqotee, wuxuu Guddiga Sare degdeg cagaha u dhigayey goob kasta oo ay khatar hor lihi ka bilaabanto, isagoo ugu kala dheereynayey siday u sii kala daran yihiin. Wuxuu xoog saaray daad-gureyn, daaweyn, go'doon ka saarid, wadda sameyn, biyo-moosid, doonyo helid, raashin-gaarsiin iyo ilaalinta in uusan kala go'in xiriirka qaranku.



Guddiga Sare ee Gurmadku keli kuma ahayn la dagaallanka masiibadda daadadka, waxaana si weyn gacan u siinayey lana shaqaynayey Guddi Hoosaadyo heer Gobol iyo heer Degmo ah iyo xoogag ka socday Hay'adaha Dawladda. Waxaa intaas dheeraa iyadoo shacbiga Soomaaliyeed aanu u kala harin isuna jilcin wax ka qabashada dhibaatadaas, taasina waa haybad, qiimo iyo waddaninnimo aan barax ku jirin oo uu hidde u leeyahay shacbiga Soomaaliyeed, dunuduna ku qaddariso.

Isku duubnida iyo dadaalka dawladda iyo shacbiga haddii aanay jirteen ama caato ahaan lahayd, dhibaatada daadadku intaas aad ayey uga badan lahaayeen, waxaana dhici lahaa khasaarooyin waaweyn oo naf iyo maalba leh.

Khasaarooyinkii iyo dib-u-dhacii dhaqaale ee daadadku u geysteen dalka ka sokow, waxaa baxayey muddadii lagu hawlanaa shaqada gurmadka degdegga ah kharaj aad u xoog badan oo shidaal iyo wax la mid ah isugu jirey, loogana gol lahaa badbaadinta, taakuleynta, daad-gureynta dad iyo duunyaba wixii suurogalay iyo ka hortagga dhibaatooyinka daadadkaas. Waxaana la abaabulay qiimeyn ballaaran oo lagu raad raacayey khasaarooyinkii daadadka iyo kharajyadii ka hortagga.

Sababaha ugu muhiimsanaa ee loo sameeyey qiimeynta, waxaa ka mid ahaa:

1) In aragti iyo ogaanshoba loo yeesho waxyeellada guud iyo tan gaar ahaaneed ee ay daadadkii gaadhsiiyeen dalka.

2) In la ogaado kharajkii shaqadii ka hortagga iyo badbaadintaba ee dhibaatadii fatahaaddu keentay.

3) In la ogaado dhibaatooyinka loo baahan yahay in degdeg wax looga qabto meelihii ay daadadku waxyeelleeyeen siiba xagga dhismayaasha bulsho, sida isbitaallada, dugsiyada, marinnada muhiimka ah iyo haddayb jiraan dad tabaalaysan oo aan daryeel ku filan la siin wax ka qabasho degdeg ahna u baahan.

4) In la ogaado goobaha ay dhibaatadu ugu weyneyd, si meelaha looga xoojiyo ka hortagga iyo ka taxaddarka daadad dambe.

5) In la soo qiimeeyo waxyaalihii baaba'ay ama waxyeelloobay, si looga tixraaco hawsha dib u soo nooleynta waxyaalahaas hallaabay iyo kala mudnaanta wax ka qabadkeeda degdeg ah.

6) Ogaanshaha meesha ay marayso hawsha ka hortagga iyo ka badbaadinta fataha iyo dhibaatooyinka hortaagan.

7) Xaddiga iyo xuduudda khasaara walba mid guud iyo mid gaar ahaaneedba, si ciwal-celintaadu caddaalad ugu dhisnaato haddii Qaranku kartideeda yeesho.

Masiibadaas wax ka qabashadeeda, waxaa saldhig u ahaa Guddiyaduna mar walba ka shidaal qaadanayeen awaamiirta, talooyinka, tilmaamaha iyo tusaalooyinka Madaxweynaha J.D.S.

Maxaa yeelay, shacbiga Soomaaliyeed wuxuu uga bartay samo-horseednimo, hiil shacab iyo gurmad degdeg ah mar kasta oo ay dhibaato la soo deristo shacbiweynaha intii uu Kacaanku dalka majaraha u hayey.

Waxaa kaloo shacbigu uga barteen Kacaanka 21kii Oktoobar go'aammo dhaxalgal ah oo lagaga guuleysto dhibaatooyinka adag, kuwaas oo ay u heellanaan u socodsiiyaan, kolkii uu mirahooda arkana uga mahad-celiyo.



Shacbigii Soomaaliyeed ee ku tabaaloobay waxyeelladii ka timid fatahaadda webiyada iyo roobabka, waxay mahad ballaaran u celinayaan Madaxweynahooda, Jaalle Siyaad, iyagoo aan weligood halmaameyn badbaadintii iyo gurmadkii heerka Qaran ahaa ee loo fidiyey.

Waxaa lama illoobaan ah, dalalkii iyo hay'adihii caalamiga ahaa ee kaalmada u fidiyey dadkii ay daadadku waxyeelleeyeen, dhibaatadaasna isku garab taagay dawladda Soomaaliyeed.

Waxaan hawl-galkoodii gurmad ee waxtarka lahaa ku bogaadinayaa Guddiyadii ka shaqaynayey la dagaallanka daadadka ee kala ahaa: Guddiga Qaranka ee Gurmadka Fatahaadda Webiyada iyo Roobabka, Guddiyadii Gobollada iyo Degmooyinka iyo dadweynahoodii, Guddigii Qiimeynta, Hay'adihii kala duwanaa ee Dawladda iyo Guddiga Qoraalka Buuggan.

Haddaba, haddii dad loo diro waajibaad gudasho hawleed oo aan caadi ahayn, waa in hawsha loo habeeyo hab kontrool iyo hogaamin leh. Maxaa yeelay, kontroolka shaqo waa sugidda hawsha iyo horumarinteeda, wuxuuna qofka xilkaska ah ku dhaliyaa fantasiyaha fikradda dhiirrata oo wax dhasha iyo isku dhammaanta shaqadiisa, qofka dhoohanna wuxuu ka dhaadhiciyaa u dhiifoonaanta shaqadiisa, dhaliil ka carar iyo in uu Qarankuu indho iyo dhego leeyahay. Wuxuu kontroolku meel mariyaa murtida tidhaahda «Qof waliba wuxuu dhaliyuu dheefteeda iyo dheg-ka-maqalkeeda leeyahay».

Habayntaa shaqo kaddib, waa in ay jirtaa abaalmarin, ammaan ama dhaliil ah, xil gudasho iyo xil gudasho la'aan kaddib. Sidaa daraaddeed, waxaan ku ammaanayaa uguna

hambalyeynayaa guddiyadii iyo shaqaalihii gobolladii fatahaadda kuwoodii muujiyey xilkasnimada iyo hawlkarnimada, laguna abaalmariyey heerarka kala duwan oo lahaa Billad Maar ah oo hawlkarnimo, Shahaado Sharafyo iyo dallacaad hal darajo ah, dadkaas oo tiradoodu dhammayd 300 oo qof. Waxaana la dhaliilay Gobolka J/Dhexe oo ay badiba sababteeda lahayd Degmada Jilib, oo aan loo bogin habkeedii maamul iyo hawl-qabadkeedii shaqadii fatahaadda webiyada iyo roobabka, iyo Gobolka oo guud ahaanba hawl-qabadkiisu ay yarayd.

G/le Sare Cabdirasaaq Maxamuud Abuubakar
Guddoomiyaha Guddiga Qaranka ee Gurmadka
Fatahaadda Webiyada iyo Roobabka



## CIMILADA SOOMAALIYA

Xaaladda cimilada Soomaaliyeed waxay had iyo jeer ku xidhan tahay xoogga iyo kolba meesha uu joogo ITCZ-ku (Inter-tropical convergence Zone). ITCZ-ku waxa weeye gobolka dabaylaha hoose ee waqooyiga iyo koonfurtu ku kulmaan, kaas oo afka qalaad, Ingiriisiga, lagu yidhaahdo, 'Northern and Southern Hemisphere', ayna ka abuurmaan meelo leh cadaadis hoose (low pressure) iyo hawo aan degganayn (atmospheric instability).

ITCZ-ku waxuu ku xidhan yahay dhaqaaqa qorraxda qalqallooceeda (Sun's declination) iyo xilliyada sannadka -qalqallooca qorraxdu wuxuu sameeyaa xilliyo isku xidhi-idhsan oo kala duwan, kuwaas oo sameeya roobabka. hawada aan degganayn, ee ka abuuranta meesha uu joogo ITCZ-ku, waxay iyana sameysaa badanaa roobabka.

Ilaa iyo aakhirka bisha Maarso ITCZ-ku waxa uu joogaa dhinaca koonfureed ee dhul-badhaha (equator), waxaana ka dhaca dalka Soomaaliya, gaar ahaan meelaha xeebaha ah, dabaylo xoog leh oo ka yimaada xagga waqooyi bari (North-easterly Mansoon), waana xilliga aannu roob jirin ee loo yaqaan jiilaalka.

Roobka gu'ga ee caadiga ahi wuxuu bilowdaa aakhirka bisha Maarso ama bilowga bisha Abriil. Di'idda roobku badanaa waa natiijada waxa kor u kaca ee uu keeno ITCZ-ku. Marka ITCZ-ku uu joogo koonfur ama koonfur-galbeed ee ay dhacayaan dabaylaha Monsuunka Koonfureed ama Koonfur-galbeed, waxaa uu keenaa hawo qoyan oo leh biyo kana timaadda badweynta Hindiya, taas oo keenta roobab badan.

Xaraarada Soomaaliya waa mid ah joogto, mana laha faraq weyn oo u dhexeeya sannadkii. Xaraaradda ugu sarreysa iyo tan ugu hooseysa waxa u dhexeeyaa waa 25.5C$^{0}$-27 $^{0}$ $^{0}$C.

Dabaylah ka dhaca Soomaaliya ma aha kuwo khatar ah, nkasta oo laga yaabo in sannadaha qaarkood ay ka dhacaan luufaanno wata roobab dhinaca xeebaha Waqooyi Bari. Dabaylaha ugu muhiimsan ee ka dhaca dalku waa dabaysha monsuunka waqooyi-bari (North-East Monsoon), iyo dabaysha monsuunka koonfur-galbeed (South- West Monsoon).

Xilliyada dalka Soomaaliya waxaa loo tiriyaa afar:-

1. Xilliga jiilaalka, oo ah Disambar-Maarso. Xilligan waxa dalka ka dhaca dabaylaha Waqooyi-bari oo engegan, kulaylna ah.
2. Abriil-Maajo oo ah guga, waa xilli qoyan marka loo eego ka koowaad.
3. Juun.Sebtembar oo ah xilliga xagaaga ma laha roobab badan; wax yar ayaa ka da'a dhinaca Xeebaha, guduhuna (inland) waa engeg.
4. Xilliga dayrta oo ah Oktoobar-Nofembar, waxaa da'a roob xoog leh, laakiin ka yar ka da'a xilliga guga. Dayrtii waxaa engegan kululna Xeebaha Waqooyiga.

Roobabka ka da'a dalka Soomaaliya waa 150mm-500mm. Roobabkaas boqolkiiba lixdan iyo kow (61%) waxay da'aan xilliga guga, boqolkiiba labaatan-iyo-afarna (24%) waxay da'aan xilliga dayrta; boqolkiiba shan iyo tobanka kalena waa roobab yaryar oo da'a xilliyada kale ee sannadka.

Roobabkii da'ay gugii 1981dii ayaa aad uga badnaa kuwii caadiga ahaa, waxayna ka badnaayeen 250mm ama boqolkiiba konton (50%). Sababta ay roobabka sannadkan (1981) da'ay uga bateen kuwii caadiga ahaa waxay ahayd:-

1. Kulaylka (thermal conductivity) oo ka badnaa kii sannaddadii hore.
2. Roobabka oo ka soo horreeyey xilligii ay sida caadiga ah u di'i jireen.



3. ITCZ-ka oo ka firfircoonaa sidii sannadii hore.
4. Daruuraha lagu magacaabo Cb (Cumulonibus), oo ah kuwa roobabaka xoogga leh dhaliya, ayaa ka badnaa kuwii sannaddadii hore ka dhalan jiray meelaha dhaadheer (high lands) ee Kiinya, Itoobiya iyo Soomaaliya. Daruurahaasi waxay ku sii badnaayeen dalka Itoobiya, waxayna keeneen roobab badan.


## WEBIYADA SOOMAALIYA

Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaa dhex mara laba webi (Jubba iyo Shabeelle).

Webiga Jubba wuxuu ka soo rogmadaa dalalka Itoobiya iyo Kiinya, wuxuuna JDS ka soo galaa Magaalada Doolow. Dhererka Webi Jubba, marka laga soo tiriyo Doolow, waxa weeye 800km; marka laga sootiriyo bilowga Webi Gestro oo uu ka yimaadana waxaa weeye 1306km. Daadka ka soo rogmada Webi Jubba waa natiijada roobka ka da'a dalalka uu webigu maro (Kiinya, Itoobiya iyo Soomaaliya).

Daadadku waxay ka soo rogmadaan meelaha dhaadheer, buuraleyda, ee dalalka Webigu maro. Inta u dhexaysa Luuq-Ganaane iyo Baardheere biyaha Webigu waxay kordhaan boqolkiiba saddex iyo toban (13%).

Sida ay muujinayaan qiyaaso laga qaaday meelo ku yaal Webi Jubba, oo ay ka mid yihiin Luuq-ganaane, Baardheere iyo Koytoy, waxa dhici kara in Webiga ay soo maraan daadad waaweyni (Maximum discharge). Waxa dhici kara inay tobankii sanoba hal mar webiga soo maraan daadad quwaddoodu tahay 2150M3/sc; 2380M3/sc; ama 2430M3/sc. Waxa kaloo la arki karaa tobankii sanoba laba jeer in ay Jubba soo maraan daadad quwaddoodu tahay 1940M3/sc, 2060M3/sc, ama 2097M3/sc. Waxaa iyana dhici karta in tobankii sanoba ay Jubba soo maraan daadad quwaddoodu le'egtahay 1705M3/sc, 1950M3!sc, ama 2000M3/sc. Sannadaha ay




daadkaas oo kale soo mareen webiga, dhibaatooyinna ay geysteen, waxa ka mid ah 1951, 1961, 1977.

Daadadka Sannadka 1981 ka soo rogmaday Webi Jubba quwaddoodu waxay ahayd 1500M3/sc. Heerka ugu sarreeyey ee ay gaadheen biyaha Webigu wuxuu ahaa 6.25m. Markaa daadadkani sidaa uma badnayn marka loo eego kii 1977dii oo ay quwaddoodu ahayd 2120M3/sc, heerka ugu sarreeyey ee ay gaadheen biyaha webiguna ahaa 6.99m.

fatahaadda Webi Jubba ee 1981du kamay dhalan daadka webiga soo maray weynaantiisa oo qudha. Waxa jirey sababo kale oo keenay in webigu fataho; sababahaas qaarkood, sida mashaariicda laga dhisay agagaarka webiga iyo roobabka dalka gudihiisa ka da'ay, waxay keeneen in webiga ay biyo badani ku soo qulqulaan oo ay dhaafiyaan heerkiisii ugu sarreeyey, 5.Om.

Webiga Jubba wuxuu fataha bilaabaa marka uu gaadho 5.5m. Sannadka 1981da wuxuu gaadhay heerkiisii ugu sarreeyey 6.25m. Taasi waxay ku tusaysaa heerka biyaha Jubba soo maray 1981da uu aad uga sarreeyey kii biyaha caadiga ah oo ah 4.Om-4.8m. Heerka biyaha saa'idka ah ee ka fatahay Jubba wuxuu ahaa 1.45m. Quwaddooduna waxay ahayd 348M3/sc. Haddii aqoon Teknoloojiyo sare iyo qalab casri ah lagaga hortegi lahaa daadadka 1981da dhibaatada ay geysteen way ka yaraan lahayd inta ay noqotay.

Webi Shabeelle wuxuu ka soo rogmadaa buuraha dhaadheer ee dhinaca bari ee dalka Itoobiya (High plateau of Ethiopia). Biyo qabadka (catchment area) Shabeelle wuxuu ka kooban yahay dhul dhan ilaa 300.000km2. Dhererka Webi Shabeelle, inta uu Soomaaliya ka maro, waa 1100km. Daadka ka soo rogmada Shabeelle boqolkiiba sagaashan (90%) wuxuu ka yimaadaa dalka Itoobiya; boqolkiiba tobanna (10%) waa daadadka ka dhasha roobabka ka da'a Soomaaliya gudaheeda soona raaca laagaha (downstreams) ku biyo shuba webiga.

Daadadka sannadka 1981da ka soo rogmaday webi Shabeelle quwaddoodu waxay ahayd 660M3/sc; heerka ugu sarreeyey ee ay marayeenna wuxuu ahaa 6.70m. Daadka 1981du aad ayuu uga badnaa kii 1977dii soo maray isla Shabeelle oo ay quwaddiisu ahayd 375M3/sc; heerka ugu sarreeyey ee uu gaadhayna ahaa 5.99m. Daadkii Shabeelle soo maray 1961dii isna quwaddiisu waxay ahayd 360M3/sc; heerka ugu sarreeyey ee uu gaadheyna wuxuu ahaa 5.72m. Taasi waxay ina tusaysaa in daadka 1981du ahaa kii ugu weynaa.

Webi Shabeelle waxa uu bilaabaa fataha marka uu gaadho 5.4m. Heerka daadka caadiga ahi waa 4.5-7m. Webi Shabeelle wuxuu sannadka 1981da dulmaray heerkiisii caadiga ahaa in ku dhow 2.Om. Quwadda daadka saa'idka ahina waxay ahayd 600M3/sc. Sababta ugu weyn ee uu Shabeelle sannadka 1981da u fatahay waxay ahayd daadka soo maray oo aad u badnaa.

Maalintii daadka weyn (Shabeelle) ee ka soo rogmaday Itoobiya uu soo gaadhay Degmada Beledweyne, waxay ahayd 16.3.1981. Maalintaa ka hor waxaa Webiga soo maray daad yar oo aan ka iman meelaha webigu ka soo rogmado; daadkaasi wuxuu magaalada Beledweyne soo maray 3.3.1981.

Daadadka Webiyada Soomaaliya boqolkiiba sagaashan ma aha roobabka ku da'a Soomaaliya, sidaa darteed fataha webiyadu, inta badan, kuma xidhna roobabka ka da'a dalka gudihiisa. Roobabka ku da'a webiyada Jubba iyo Shabeelle inta dalka Soomaaliya ku jirtaa waa 250mm ilaa 600 mm. Sannadka ay da'aan roobab aan caadi ahayni waxay noqdaan 1600mm. Daadadka soo mara Jubba iyo Shabeelle waxay inta badan ku xidhan yihiin roobabka ka da'a dhulsaraha ay ka soo bilowdaan (Itoobiya iyo Kiinya); roobabka ka da'a dalka Soomaaliya gudihiisuna waxay kor u dhigaan heerkii Webiyada, markaa waxaa dhici kara in ay fatihiyaan webiyada oo daadkii ay waddanka la soo galeen aannu fataheen.



Su'aashu waxay tahay, maxaa daadadka qaarna ka dhiga kuwo khatar ah, oo keena fatahaad, qaarna kuwo caadi ah. Daadku waa natiijada kolba roobabaka sannadkaa da'a; marka roobab aad u waaweyni da'aanna waxa soo rogmada daadad laxaad leh oo fatah keeni kara, marka roobab caadi ahi da'aanna waxa soo rogmada daadad caadi ah. Waxaana badanaa dhacda in roobabka qiyaastoodu tahay 500mm ama ka sii yari ay keenaan daadad caadi ah oo aan khatar lahayn.

Haddaba, sida sannaddada qaarkood dhacda hawadu way isbeddeshaa dabeecadda awgeed. Isbeddelkaasi wuxuu noqdaa mid keena roob yari ama roob badnaan, sida dhacday 1981da oo kale.

Daadka soo mara Webiyada Jubba iyo Shabeelle boqolkiiba afartan ilaa konton (40-50%) waxa weeye roobabka da'a xilliga guga, boqolkiiba labaatan ilaa soddonna (20-30%) waa kuwa da'a xilliga dayrta. Wakhtiga daadka ugu weyni soo maro Webiyada Soomaaliya waa sitimaanka saddexaad ama afraad ee bisha Abriil, wakhtigaas oo ah dhowr toddobaad ka dib bilowga gugu.

## FATAHAADDII WEBIYADA IYO ROOBABKA GUGII 1981

Kaliishii gugii 1981dii, iyadoo ay dalka ka taagan tahay abaar xumi, labadii webina (Jubba iyo Shabeelle) ay go'an yihiin, ayey horraantii bishii Maarso bilowdeen roobabkii gugu, webiyadina soo rogmadeen. Wuxuu gugu curtay iyadoo dad, duunyo iyo dhirba uu harraad darani hayo. Waxay kaliishaasi ahayd mid aad loo falay dhulka oo uu abuur badani sugayey biyihii uu ku bixi lahaa ee roob ama webi. Aad ayey dadku ugu faraxsanaayeen gugaas oo ka soo yara hormaray xilliigii ay roobabka gugu dalka ka bilaaban jireen, waxay u adkaysan la'aayeen baahida ay iyaga, xoolahooda iyo dhulkooduba u qabeen biyo.


Roobabkii gugu (1981) ee ka bilowday dalku waxay u da'een si xoog leh oo isdabajoog ah. Qiyaastii roobkii gugu waxay noqotay 750mm. Dadkii iyo xoolihii u jilicsanaa roob la'aanta ayey haddana sii jilciyeen jirarki. Waxa markiiba-isla markay roobabku bilaabmeenba-baaba'day baahidii guud ahaan loo qabay biyo, waxaana soo ifbaxday baahi loo qabo si biyo laga yeelo. Roob aan kala go' lahayn ayay dadkii ka shaqaysan kari waayeen, xoolihii weydda ahaana ka foofi kari waayeen. Sugiddii biyaha waxa u beddeshay abuurkii beraha, inuu sugo inta biyuhu ka gudbayaan.

Wuxuu noqday gugii 1981 gu'yaashaasi ugu di'id badnaa dalka Soomaaliya; wuxuu ka mid ahaa kuwii ugu aaransanaa uguna hagardaamo badnaa marka la eego waxyeellada uu keli ahaanta u geystay ama uu webiyada la kaashaday ka dib markuu ka caawiyey inay fatahaan.;


Webiyada Jubba iyo Shabeelle oo ay soo rogmashadoodu la kulantay bilowgii (dalka dhexdiisa) guga ayaa markiiba soo buuxsamay, in yar ka dibna bilaabay inay qarqarrada jebiyaan ama butaacaan. webiyadi intay buux dhaafann ayay sameeyeen qarshub. Meel kasta oo ay biyihii marayey webiyadu ka bixi karaanba way ka baxeen: waxay ka jabeen kannaalladii, hilooyinkii iyo garbadii gaabnayd oo dhan. Waxa ka dhacday fatahaad aan loo fadhiyin. Baahidii loo qabay biyo webiyada laga soo duwado waxa beddeshay mid loo qabo sidii laysaga joojin lahaa biyihii webiyada ka soo burqanaayey - muddada u dhaxaysay labadaa baahiyood waxay ahayd ayaamo yar.

Inyar ka dib bilowgii roobabka iyo soo rogmashada webiyada, waxay isu beddeshay xaaladdii dadkii degganaa gobollada dalka ee ay webiyadu maraan mid tii ay hore ugu jireen dhan kala jaad ah dhanna kaga lid ah. Haddii ay haysey dhibaato biyo la'aaneed waxa u beddeshay dhibaato biyood: harraad iyo hafasho ayaa isu kala beddelay. Waxay markii hore kala dhex joogeen cir qaawan iyo carro qallalan, markii dambena waxay u dhexeeyeen biyihii daruurta iyo daad dhulka ah.





*Dad uu cidla ku ootay daad*



*Dadkii ka qaxayey degaannadii daadooba.*

Daadadkaa ku fatahay dalku waxay ahaayeen qaar xoog leh. marka ay ku shubmaan meelo godan sida looga baxsadaa ama wax looga daadgureystaa way adkayd. waxa dhacaysay in mararka qaarkood ay dad meel ku ootaan, oo dadkaasi ay dhirta ka fuulaan. Daadadka degaannada, bannanada iyo kaymaha dhexdooda qulqulaayey waxa jooggoodu, meelo, gaadhaayey laba mitir iyo badh, (2.5m); waxay liqi karayeen dadka iyo guryaha qaarkoodba.

Meelaha biyo qabatinka leh oo ay ka sameysmayeen harooyin yaryari marka biyaha daadku ay galaan, waxa lagu arkaayey kalluun aad u tiro badan. Way adagtahay inaad si bayaan ah biyaha webiyada ee caadiga ah ugu aragto kalluun dhex yaacaya; daadadkii bannaanada iyo kaymaha dhex rogmanayayna, meel aannu joogga biyaha daadka ahi ka dheereyn labaatan sentimitir, oo ay biyuhu u socdaan si baahsan, ayaa lagu arkaayey kalluun aan xaddi lahayn. Soomaalidu waxay aad u isticmaalaan hilibka xoolaha (adhi, lo', geel) oo ma jecla ka kalluunka, waxsaad moodeysay in ay fatahaaddu dadka Soomaaliyeed baraysay in ay webiyada ka heli karaan kalluun badan.

**Sababihii dhaliyey fatahaadda webiyada:**

1. Roobab waaweyn oo ka da'ay dalka iyo buuraleyda ay webiyada Jubba iyo Shabeelle ka soo bilowdaan, ayaa dhaliyey in ay webiyada ku soo dhacaan biyo ka badan muggoodii. Waxa dhacaysay in webiyada saddexdooda marinba (sare, dhexe iyo hoose) ay biyo kaga soo biiraan, markaasna ay buux-dhaafaan-isla markii ay yaraadeen roobabkii dalka gudihiisa ka da'ayeyba, fatahaadiina way yaraatay.

2. Waxa labada webiba ku badan hillooyin ka jeexan garbooyinkooda. Hilooyinkaasi waa kaalimo laga cabbo xilliyada ay webiyadu hoos u dhacaan ama ay go'aanba, laakiin meel-meel biyo ku hadhaan. Jeexidda hilooyinku

waxay aad u kordhaa xilliyada abaarta, sidii dhacday sannadihii 1973-75 iyo 1979-80 (abaartani waxay u soo gudubtay labadii bilood ee hore ee sannadka 1981).

Hilooyinkaas oo marka la isticmaalaba sii gota siina weynaada ayaa marka webiyadu buuxsamaan ay biyuhu ka jabaan.

Biyo-mareenno (kannaallo) ayaa jira laga jeexday webiyada oo aan loo sameyn hakad-biyood (baratooyo-). Kannaalladaa iska furan ayay biyaha webiyadu marka ay ku leexan karaanba iska maraan, sannadkan (1981) oo ay webiyadu buux dhaafeen aad u sahlay in daadad badani ka jabaan webiyada.

4. Qaadkii (ama muggii) webiyada ayaa yaraaday. Ciid badan ayaa gashay gudaha webiyada lagumana sameyn carro-bixin. Ciiddaasi waxay inta badan ku tuuran tahay xaglaha daacsan. Iyada oo ay webiyada biyo doori marayaan ayaa la arkaa meelo sagxadda webiyada ah oo ay biyihii ka kala baydheen ciid ku tuurantay awgeed.

5. Waxa jirey faro badan oo loogu tala galay in webiyada lagaga neefiyo kuwaas oo aan sannadkan shaqeyn. Qaar waa la xidhay; qaarna waa iska aasmeen. Farahaas oo biyaha webiyada geeya meelo aanay waxyeello ka geysan ayay kaalintoodi bannaanayd sannadkan.

6. Agagaarka webiyada ayaa la cidhiidhiyey, waxaa cidhiidhkaa badiba dhaliyey mashaariic badan oo laga sameeyey webiyada agtooda, gaar ahaan, Jubba, wuxuuna keenay in biyo badani ku soo qulqulaan webiyada dabadeedna heerkii biyaha webiyadu kor u kaco.



## GOBOLLADII AY WEBIYADU KU FATAHEEN

Waxa ay webiyadu ku fataheen gobollada Gedo, Jubbada Dhexe, Jubbada Hoose, Hiiraan, Shabeellaha Dhexe iyo Shabeellaha Hoose. Saddexda hore waxaa mara webiga Jubba - wuxuu ugu soo kala horreeyaa sida ay u kala horreeyaan - saddexda dambena waxaa mara webiga Shabeelle isagoo ugu soo kala horreeya sida ay u kala horreeyaan. Gobolladaasi waa kuwa ugu wax soo saar beereed badan; waana meelaha ay beeraleyda ugu badan ee dalku degan yihiin, beeraleydaa oo ku teedsan webiyada jiinkooda. Fatahaadda ka sokow, waxaa Gobolladaan ka da'ay roobab waaweyn.

Gobolka Gedo oo ah ka uu webiga Jubba ka soo galo Xuduudda J.D.S. wuxuu ahaa midka ugu sahlanaa waxyeello ka dhalatay daadadkii. Degmooyinka Baardheere iyo Luuqba waxa ka soo yeedhay qeylo. Ta hore, oo uu webigu si doora ugu jabay, waxay ka cabanaysay halis daad iyo go'doon. Ta dambe oo ay dulsaar ku ahaayeen xerooyin qaxooti oo dhowr ahaa dhibaatada ugu weyni waxay ka haysatay go'doom badiba ka dhashay daadadka roobabka.

Webiga Jubba marka uu hoos u soo dhaafo Gobolka Gedo wuxuu soo galaa Gobolka Jubbada Dhexe, gobolkaas oo ka mid ahaa gobollada dalka ee ay fatahaaddii 1981 sida ba'an u waxyeellaysay, waxay daadadkii fatahaadda iyo roobabku u geysteen gobolkaas waxyeello beereed, dhismo iyo waddo oo badan. Waxay daadadku ku fataheen gobolkaas dhexdiisa degmooyinka Saakow, Bu'aale iyo Jilib; waxaana ugu waxyeello xumayd Degmada Jilib. Dhibaatada ay daadadku u geysteen saddexdaa degmo in ka badan boqolkiiba konton (50%) waxay ka dhacday degmada Jilib dhexdeeda.

Gobolka Jubbada Hoose oo ah ka uu dhexdiisa webiga Jubba kaga biyo shubo Badweynta Hindiya, waxay daad-

adka sannadka 1981du waxyello ka rideen degmooyinka Kismaayo iyo Jamaame: waxa labada degmo sii darnayd Jamaame,waxyellada boqolkiiba siddeetan iyada ayaa qabtay.

Qaylo fatahaadeed oo ka soo yeedha gobollada kuna soo dhacda caasimadda dalka, Muqdisho, waxay ka soo yeedhay Gobolka Hiiraan, Degmada Beledweyne. Gobolka Hiiraan wuxuu ku yaal soohdinta u dhaxaysa JDS iyo Soomaali Galbeed (oo ah dhul Soomaaliyeed oo Xabashidu gumeysato, horena loogu magacaabi jiray Ogaadeeniya) wuxuuna u dhexeeyaa Gobollada Bakool (galbeed) iyo Galguduud (bari). Wuxuu ka mid ahaa Gobollada dalka ee ay daadadkii fatahaadda iyo roobabku sida laxaadka leh u dhaawaceen gugii 1981dii. Gobolkani waa halka uu webiga Shabeelle ka soo galo soohdinta J.D.S.


Dadkii sida caadiga ah u degganaa Gobolka Hiiraan waxa dhibaatada daadka la qabey dad kale oo aan kaba tiro yarayn ahaana qaxooti (Soomaali) ka soo qaxay dhulkoodii ay degganaayeen oo ay Xabashiyi ka soo saartay. Qaxootigaasi wuxu gobolka ka deggenaa degmooyinka Beledweyne iyo Jalalaqsi. Xeryaha qaxootiga (gobolka dhexdiisa) oo ahaa toban (sagaal rasmi ah iyo mid ku meel gaar ah) qaarkood daad ayaa galay waana laga guuray, darna way go'doomeen.

Degmooyinka Gobolka Hiiraan waxay daadadku waxyeelleeyeen Degmada Beledweyne, Buulo-burte iyo Jalalaqsi. Saddexda waxa ugu waxyeello badnayd Degmada Beledweyne, waxaana ku xigtay Degmada Buulo-buurte. Magaalada Beledweyne ayaa ahayd degaan ay daadadkaa 1981dii galaan kii ugu weynaa: siddeed-meelood-oo-shan (5/8) ayey biyo galeen magaalada Beledweyne, biyahaas oo meelo magaalada dhexdeeda ah jooggooda hoose gaadhay ilaa laba mitir.





*Jalalaqsi: Xero qaxooti oo uu daad qaaday (inta cad)*



*Daad baahsan oo ku fiday tuulo iyo dhul beereedkeedii*

Webiga Shabeelle marka uu hoos u soo dhaafo Degmada Jalalaqsi, oo ah Degmada ugu dambeysa ee uu ka maro Gobolka Hiiraan, wuxuu soo galaa Gobolka Shabeellaha Dhexe. Degmooyinka Gobolka Shabeellaha Dhexe wuxuu webigu maraa Degmada Jowhar iyo Degmada Balcad. Labada degmoba daadadkii 1981dii ee ka dhashay fatahaaddii webiga iyo roobabkii, waxyeello ayey gaadhsiiyeen; waxaana sii darrayd Degmada Jowhar. Bishii Maarso 25dii, 1981, ayuu ugu horrayntii, xilligaas, ka fatahay Shabelle gobolkan dhexdiisa; wuxuuna ka fatahay tuulooyinka Buulo-Axmed iyo Sabuun oo ka tirsan Degmada Jowhar.

Dhowr jeer oo hore ayaa loo soo joogay Webiga Shabeelle oo ku fatahay Gobolka Shabeellaha Dhexe. Gobolku wuxuu meelaha kale ee uu webigu maro la qabay fatahaaddii 1910naaddadii (xilligaas ayey wabiyadu aad u fataheen oo ay daadad laxaad lahaa ka jabeen). Waxa la xusuusan yahay daad waagaa ka jabay Webiga, Gobolka dhexdiisa, oo gaadhay Gobolka Shabeellaha Hoose. Wuxuu isna webigu si laxaad lahayd ugu fatahay Gobolka Shabeellaha Dhexe sannadkii 1961dii, xilligaas oo ay labada webiba si xun u fataheen. Intii ka horreysay 1981dii ee la ogsoon yahay, labadaa wakhti (1910kii iyo 1961) ayuu ugu darraa daad webiga Shabeelle ka baxa oo ku burqada Gobolka Shabeellaha Dhexe dhexdiisa.

Sannadkii 1977dii ayuu isna si doora webigu u mashaqeeyey Gobolka oo uu daadeeyey dhowr Tuulo, beero badanna baabi'iyey; fatahaadda Shabeelle ee 1977dii waxay muujisay in Gobolka Sh/Dhexe yahay meel aad ugu halis ah in webigu ku fataho, waayo sannadkaa inta uu Shabeelle maro isaga ayuunbaa ahaa meel uu ka socday gurmad fatah.

Hanjabaadda uu webiga Shabeelle u muujiyey 1977dii Gobolka Sh/Dhexe, oo 1981dii u muuqan weyday sidii la



moodayey, waxa dadaalkii Gobolku waday, carro-tuur socday ilaa 1977dii, kala qeyb qaatay beenaynteeda biyoxidheen uu dhismihiisu socday xilligii fatahaaddii 1977dii, ta 1981duna ay ku timi isaga oo diyaar u ah inuu biyo qabto. Biyo xidheedhkaas oo shan iyo toban kiilomitir xagga bari ka xiga magaalada Jowhar, wuxu qaadkiisu dhan yahay 200.000,000 M3 (cbm). Bishii Maarso 29dii, 1981, ayaa isaga oo madhan oodda lagaga qaaday biyihii ugu badnaa ee ugu horreeyey ee gala ilaa iyo intii la dhisay: waxa ku dhacay 154.000,000 M3-waxay biyuhu ku socdeen ilaa 4.6.1981.

Waxyeellada ay fatahaaddii Shabeelle gaadhsiisey Gobolka Sh/Dhexe 1981dii waxay inta ay noqotay ka badan lahayd haddii aanay dhicin in webigu, intaanu biyoxidheedhkaba soo gaadhin, meelo badan hore ugu soo jabay, meelahaas oo ay ka baxeen biyo badan oo aan dib webiga ugu soo noqon. Waxaa meelo ka dhacaysay in daad webiga ka baxay uu isagii dib ugu soo noqdo.

Saddexda degmo ee uu webigu kaga fatahay gobolka Hiiraan mid walba wuxuu webigu ku soo lumiyey biyo badan-Degmada Beledweyne ayay badiba biyihii webiga ka baxay haddana isaga dib ugu soo noqdeen. Beesha Mahadday weyne (Degmada Jowhar) agteedana waxa webiga kaga baxay daadkii ugu badnaa ee ka jaba sannadka 1981.

Inkasta oo uu ku yaal marin hoosaadka webiga Shabeelle, marinkaas oo ay marka webigu soo buuxsamo ka muuqato cabsi fatahaadeed, haddana Gobolka Sh/hoose wuxuu ahaa ka ay ugu yarayd fatahaad dhexdiisa ka dhacdaa sannadkii 1981dii. Waxay daadadkii sannadkaasi waxyeelleeyeen Degmooyinka Afgooye iyo Wanle-weyn; labadaba waxyeello doora ayaa gaadhay. Meesha keliya ee uu webigu Gobolka Sh/hoose dhexdiisa aad ugu fatahay waxay ahayd far ka jabtay Tuulada Daara-salaam oo ku taal Degmada Afgooye.

Waxyeellada ugu weyn ee soo gaadhay Afgooye iyo Wanleweyn waxay ka dhalatay daadkii webiga Shabeelle kaga soo jabay Gobolka Sh/dhexe (Degmada Jowhar, beesha Mahadaay), daadkaas oo isaga oo faafsan xoogna leh ku soo ekaaday degmooyinka Afgooye iyo Wanleweyn. Gobolka Sh/hoose wuxuu ahaa meeshii uu ka dhacay gurmadkii fataha ee ugu dambeeyey; mar ay daadadkii ka joogsadeen gobollada kale oo dhan, gurmadkii ka socdayna qaboobay, ayuu la dagaallankii daad ee ka dhacay gobolkaasi marayey heerkii ugu darraa.


## QAABKII WAXYEELLLADA IYO KHASAARIHII

Waxyeelladii ugu horreysay ee ay geystaan daadadkii ku burqaday dalka 1981dii waxay dhacday bishii Maarso, waxayna si aan kala go' lahayn u socotay ilaa bishii Juun ee sannadkaa. Daadka ka jabaayey webiyada oo iyagu badiba keenayey waxyelladu, waxay isla marka ay webiga ka baydhaanba gelayeen beeraha, degaannada, iyo waddooyinka.

Daadadkaas waxay baabi'iyeen beero aad u badan. Beeraleyda Soomaaliyeed oo ay soo martay abaar ilaa saddex sanoba haysay, si aad ah ayey ugu diyaar garoobeen gugii 1981dii, waxayna abuurteen dhul ballaadhan oo ay ugu talo galeen biya'ha webiyada iyo roobabaka, dhulkaas oo ay badiba ku abuureen galley, meseggo iyo sisin. Waxaa jirey mashaariic waaweyn oo ay dawladdu leedahay (Mareerrey, Faanoole, Qasabka Jowhar) kuna yiil agagaarka webiyada. Asendooyinka muuska ayaa jirey oo ku xer-xeran marinhoosaadyada webiyada. Intaas oo tacab beereed ah, iyo qaar kale oo khudaareed, nooc aanay waxyeello gaadhini ma jirin.

Roobabka badan iyo daadadku beeraha, siiba meseggada iyo galleyda, inta ay baabi'iyeen mooyee, inta soo hadha way qooqinayeen: beeruhu intay aad u baxaan, oo uu dhererkoodu dhaafo heerkii caadiga ahaa, ayaanay haddana midhaysanayn. Waxaa la helaayey bal dhererkiisu gaadhay






*Beerihii uu daadku galay*



*Waddada Afgooye-Wanlaweyn oo daad gooyay*



*Tuulo uu daad qabsaday*



*Beerihii uu daadku xaaqay*


saddex mitir iyo saayid oo aan haddana midhaysan xitaa magoolinna. Beero badan oo aad araggooda dusha mooddo in tacbiddoodii lagu guuleystay, ayaan haddana kuwii ay daadadku gooyeen waxba dhaamin, bal mooyaane.

Beerihii aanay goyn daadadkii iyo kuwii ka dib la abuurayba badanaa waxa ku dhashay cudurro iyo cayayaan badan. Beeraha galleyda iyo meseggada oo uu badiba dhuun-qabad galay ayaa ugu sii darraa. Degmada Beledweyne ayaa ka mid ahayd meelaha ay aad u waxyeelleeyeen beeraheedii cudurrada iyo cayayaanku.

Waxyeelladii dalag ama tacab beereed ee ugu xumayd waxay ka dhacday Gobolka J/dhexe, gobolkaas oo ay daadadku galeen 35.159 hektar oo beera ah, midhihii ku yiil ama ka bixi lahaana ay baabi'iyeen. Inta hektar ee guud ahaan dalkaba ay daadadku baabi'iyeen dalagyadii ku yiil waxay ahaayeen 98.428 hektar (sida tiradaasi ugu kala jirtey degmooyinka ay daadadku waxyeelleeyeen, iyo dalagyada baaba'ayba waxaad ku arki doontaa qeybta qiimeynta).

Daadadka gelayey beeruhu, dalagyada ay baabi'inayeen waxay ku darayeen oo iyana ay waxyeelleynayeen kannaalladii iyo motooradii beeraha waraabin jiray. Daadadkaasi waxay dhaawac xun u geysteen toddoba iyo toban Kannaal, oo isku-darka dhererkoodu ahaa 55,736 m. Kannaalladaasu waxay ku kala yiilleen gobollada J/Hoose (siddeed), J/Dhexe (lix) iyo Hiiraan (saddex). Tirada matoorrada biyaha ee ay daadadku waxyeelleeyeen waxay ahayd toddobaatan iyo siddeed.

Daadadka ka jabayey webiyada ama ay soo rogayeen roobabkii waaweynaa ee dalka gudihiisa ka da'aayey waxay gelayeen degaannadii dadka, halkaas oo ay ku waxyeelleynayeen dhismayaasha iyo hantidii intaba. Dhowr magaalo, oo ay ugu weyneyd Beledweyne iyo tuulooyin badan ayey biyo galeen, kana dumiyeen ama ka waxyeelleeyeen guryo



Beerihii uu daadkii jiidhay ee qooqay


badan. Magaalada Beledweyne waxay daadadkaasi ka dumiyeen 218 (laba boqol toban iyo siddeed) guri; magaalada Buuloburtena waxay dumiyeen 50 (konton) guri. Tuulooyinka looga qaxay daadadku waxay dhamaayeen 127 (boqol, labaatan iyo toddoba) oo ay ku noolaayeen 10.492 qoys. Magaalo ama tuulo kasta oo uu daad galo, dhismaha ka sohow, waxaa ku waxyeelloobayey hanti u badnayd mood.

Jidadkii Gobollada ay daadadku ku burqadeen ayey iyana gaadhay waxyeello xumi. Daadadku way xidhayaan jidadka waaweyn wayna burburinayeen. Waxay daadadku gooyeen, iyaga oo meesha ay ka gudbayeen burburiyey, jidadka laamiga ah ee Jilib-Jamaame, Afgooye-Wanlaweyn, Jowhar.Buuloburte, iyo Beledweyne-Km. 115. Waxay daadadku kharribeen waddooyin badan oo caadi ahaa.


Waddooyinkaa waxyeelloobay waxa ka dhashay go'doon daran, oosi looga baxaa ay adkayd. Markii ay go'day waddada laamiga ah ee Jowhar-Buuloburte waxaa gurmad ahaan loo sameeyey laba waddo oo ku-meel gaar ah: midi waxay ahayd Muqdisho-Ruun Nirgood-Adan Yabaal-Moqokori-Buuloburte; ta kalena waxay ahayd Geelgub-Aadan Yabaal-Ceel dheere Maalin-Caadley-Mahaddaay.

Meel yar oo uu laamigu (Jowhar-Buuloburte) ka go'ay ayaa keenaysay in saddex waddo oo dhaadheer, marka loo eego ta Jowhar-Buuloburte ee xidhantay, mid uun laga wareego-waxaa kaloo la mari jirey waddada Muqdisho-Kabohirig-Buuloburte.

Jidadka xidhmay awgood waxa go'doomay 116 (boqol toban iyo lix) tuulo oo ay ku noolaayeen 10.640 qoys. Waxaa go'doonka awgii halis cunto la'aaneed ka dhacday xerooyin qaxooti oo ku kala yiil gobollada gedo iyo Hiiraan. Wuxuu go'doonkaasi xayiray u kala socodkii magaalo-madaxda dalka, Muqdisho, iyo magaalo madaxyadii gobollada dalka, laga reebo Jowhar (Sh/Dhexe) iyo Marka (Sh/Hoose).



Badhtamaha magaalada Beletweyne oo uu daadkii gaadhey laba mitir



Waxyeeladii dhisme ee daadadka




Tuulo uu qabsaday daad



Xayiraaddii gaadiidka ee ka dhalatay go'idda waddada Jowhar-Buuloburte



Waddada Jowhar-Buuloburte oo uu daad gooyey



Waxyeellada ay fatahaadda webiyada iyo roobabku u geysanayeen dalka waxa Ummadda Soomaaliyeed ugu sugnaa khasaare ballaadhan, kaas oo u badnaa xag cunto, dhisme iyo qalab.

Beeraha baaba'ayey waxay ahaayeen isha dhaqaale ee waxtar ahaan ugu laba ahayd dadka Soomaaliyeed xoolaha nool. Dad badan oo beeralay ah ayaa markii ay beerahoodii daadadkii gooyeen isu arkaayey inay caydhoobeen. Marka qoys lahaa hal beer oo uu quudkiisa ka soo saaro ay ka baaba'day wuu noqonaayey caydh. Mashruuca Dawladda (beerta) ee lagu sameeyey maalgelinta ee ay daadadku baabi'iyeen wuxuu ku ahaa Ummadda hagardaamo culus. Kannaalada ay ku baxday samayntooda lacagta badani ee fadaadoobay waxay lahaayeen khasaarahooda aan fududayn. Waxyeellada soo gaadhay matoorrada biyaha ee si lagu helaa ay ku adagtahay beeraleyda Soomaaliyeed, ayaa iyana khasaare laga naxo ahayd.

Dhismayaasha ku waxyeelloobayey ama kuba dumayey magaalooyinka iyo tuulooyinka ay daadadku galayeen waxay ahaayeen hanti khasaarowday oo ay adkayd sida looga soo kabtaa. Qoyska uu gurigiisii ka dumo, gaar ahaan magaalooyinka, uma fududayn si uu mar kale dib ugu dhistaa; hadduu xitaa awood dhaqaale u lahaa, waxaannuu si sahlan ku helayn qalabka dhismaha, siiba guryaha saraha ah. waxa dhacaysay in laysku dayo in guryaha waxyeelloobay laakiinse aan dumin markiiba dib loo hagaajiyo intii la kari karo, waayo meel lagaga maqnaado ayaan jirin. Saro ay daadadkii galay dildillaaciyeen ayaa layskaga noqonaayey iyadoon dayactir lagu sameyn, halisna ay u yihiin inay dumaan.

Waxyeellada gaadhay jidadka laamiga ah ee ay daadadku burburiyeen ayaa iyana ahayd khasaare la dareemi karo. Hal kiilomitir oo jid laami ah kharajka ay ku kacayso dib u hagaajintiisa waa mid aan fududayn (waxa laga arkayaa



sida loo qiimeeyey jidadka burburay qeybta qiimeynta). Waxa weliba dhibaato ahayd sida lagu heli karo qalabkii dib loogu dhisi lahaa waddooyinkaas.

Guud ahaanba khasaaraha ay dadaalku u geysteen ummadda Soomaaliyeed, wuxuu ahaa mid ku culus. Dunida oo ay xilligan (1981) ka taagnayd cunto-yaraani, kamay maarmayn dadka Soomaaliyeed midhaha ka baaba'ay. hantida kale ee ay daadadku ka halleeyeenna wax ka go'a ma ahayn.

## XAALADDII DADKII AY DAADADKU WAXYEELLEEYEEN

Waxyeellada daadadku waxay si ba'an u haleeshay dad beeraley ah. Dadkaasi waxay badiba degganaayeen meelo Webiga qarkiisa ah, halkaas oo ay ku yiilleen guryahooda (tuulooyinka) iyo beerahooduba. Waxa beeraleydaa sida qaalibka ah u hanti ahaa beeraha ay fashaan ee ay quudkooda ka soo saaraan oo keliya. In yar ayaa xoolo lagu arkaa tuulooyinka beeraleyda. Digaag aan badnayn ayey dhaqdaan qoysaska tuulooyinka qaarkood.

Khasaaraha ay daadadka iyo roobabku u geysanaayeen dadka beeraleyda ah ee tuulooyinka degganaa, waxaa u dheeraa rafaad ay malkinayeen. Tuulo ay boqollaal qof ku nool yihiin ayuu daad gelayey, markaas ayuu qofba wixii uu ka qaadan karo gurigiisa ula qaxayey meel kale. Dadku waxay badanaaba tuulooyinkooda si wacan uga hagaagayeen marka ay u caddaato in uu galay daad aan loogu geleynin, in uu dhaqso uga baxayaana ay u muuqan weydo.

Dadka tuulooyinka oo aan lahayn gaadiid ay wax ku rartaan, waxay dusha ku qaadanayeen carruurta iyo wixii alaab ay ku dari karaan. Waxa ku adkaanaysay meel ay dhigaan waxa ay qaadeen; hoygoodii way ka baxeen, mid ay u socdaan oo kalena ma jirin, meel walbana (dhulkii u dhawaa oo dhan) daad ayaa marayey ama roob ayaa hayey. Carruur murjuc ah ayaa lala hoos fadhiyey dhibic aanay waxba ka xigin tafta hooyadii mooyee.



*Dadkii oo ka qaxaaya tuulooyinkii markii ay daadadkii galeen*




*Dad laga soo daadgureeyey degannaadii daadoobey*

Dadka ay tuulooyinkoodii daadadku ka baro-bixiyeen way uga sii jilicsanaayeen dhibaatada ban-fadhiga kuwii degganaa magaalooyinka ee iyaba ay daadadku gury-ahoodii ka saareen. Waxay ahaayeen dadka tuulooyinku qaar markoodii horeba iska arradnaa oo aan haysan hu' ku filan. Markii ay mundulladoodii uga baxeen daadadkii galay may heleyn maryo ay dhaxantii jirtay iyo kaneecadii bad-nayd iskaga celiyaan. Waxaa dhacaysay in dadka ka soo qaxay tuulooyinka qaarkood ay degayeen meel cidla ah, halkaas oo ay ka samaysanayeen garangarro ay habeenkii kaneecada ka galaan iyo waabab aan waxba ugu fillayn oo ay iska hoos jiifsanayeen. Mararka qaarkood, waxay xitaa waayayeen dab ay wax ku karsadaan.

Baahi u baahnayd in hab gurmad wax looga qabto, ayaa dadkaa tuulooyinka ka qaxayey qabsanaysay. Waxay waayayeen cunto, waxay u baahnaayeen hoy, hu' iyo daawo. Taakulada ay dhexdooda kala helayeen,dadka tuulooyinku, may fiicnayn, waayo, marka loo eego tuulo-tuulo, tiradooda iyo waxa ay is-dhaamaan midna ma badnayn. Waxa iyana mushkilad ahayd meeshii loo mari lahaa marka la rabo in loo gurmado si loo taakuleeyo.

Inkasta oo ay dhibaato xun qabeen, haddana dadkaas beeraleyda ah ee ay daadadku waxyeelleeyeen may niyad-jabsanayn. Beer kasta oo uu daad ka galay isla marka uu ka baxo ayey dib u abuurayeen. Meelo aanay beer horeba ahayn oo uu daad maray ayey bannaynayeen oo abuuray-een. Meelo badan ayaa dhulkii daadadku beerihii ka gooyeen boqolkiiba (100%) dib loo abuuray.

Isla marka uu daadku ka baxo tuulooyinkoodii uu galay, waxay ku dhaqaaqayeen in ay dib u hagaajiyaan guryihii (badiba ,mundullo iyo carshaan) inta sii taagan. Aamminaad ay qabaan dadkaa beeraleyda ahi oo ah in aanay wanaagsa-nayn in meesha aad deggan tahay aad ka baxdaa awgeed,



Jiib: Qoys ka mid ah dadkii ay daadadku barokabixiyeen oo hoos jiifa waab


ayaanay xitaa u jeclaysanayn in ay tuulooyinkooda in badan ka maqnaadaan. Waxaa kale oo jirta aamminaad kale oo ah «Biyo kaddib waa barwaaqo», waxayna yidhaahdaan «Inta qallayl kaa gooyo qoyaan kaama gooyo».

Inkašta oo ay ahaayeen dadkaa beeraleyda ah ee ay daadadku degaannadoodii ka saareen dad u hanweyn jooggista degaannadooda, haddana qaarkood ayey dani ku khasabeysay in ay yagleeshaan meelo cusub. Kuwa uga baxa tuulooyinkooda meel aan aad uga durugsanayn ayaa meelahaas, oo ay u arkayeen in ay degaankoodii hore ka korreeyaan oo ay khatarta fatahaaddu ku yar tahay, ka dhisanayey mundullo.

Bishii Abriil 12dii, 1981kii, ayaa la arkay in magaalada Beletweyne halis u tahay in ay daadowdo, dadkii u horreeyeyna ay ka qaxeen guryahoodii. Bishaas 30diina daad weyn ayaa galay magaaladii. Inkasta oo laysku dayey in laga celiyo magaalada Beletweyne daadka, moosas badanna la kor dhigay daadkaas galayey, haddana markii la arkay in aan

Xaqiiqdii dadkaa beeraleyda ah ee tuulooyinka degganaa umay arkayn dhibaatada iyo khasaaraha ay daadadku u geysteen wax iska sahlan, haba u kala adkaysan badnaadeene. Waxay dhibaatada fatahaadda webiyada iyo roobabka ugu kala jilicsanaayeen sidii ay markoodii horeba u kala awood yaraayeen, siiba awooddooda dhaqaale ama ay ugu kala cuslayd. Waxa ku dhashay dadkaas beeraleyda ah walaac iyo cabsi ay ka qabaan fatahaad dambe oo tan 1981ka la mid ah ama kaba daran.

Dhowr magaalo oo ay ugu weyneyd uguna waxyeello cuslayd Beletweyne ayay galeen daadadkii 1981kii ee ka dhashay fatahaadda webiyada iyo roobabkii ka da'ayey dalka gudihiisa. Waxa iyana ay daadad aan u darnayn sida kuwa galay Beletweyne galeen magaalooyinka Buuloburte iyo Jalalaqsi. Balcadna waxoogaa ayaa ku soo burqaday, wayse sahlanayd.



*Jilib: Qoys ka mid ah dadkii ay daadadku waxyeeleeyeen oo yagleeshay mundul*



*Irridda Amiin (Belet-weyne) xilligii daadkii Fatahaaddii gugii 1981*

loo babac-dhigi karayn, webigana uu magaalada xadkeeda ka fatahay, waxaa dhacday in laga qaxay magaaladii.

Waxaa magaalada lagu hadhay in aan badnayn oo biyaha lagaga qabtay moos. Dadka ka qaxay magaalada badh, waxay uga baxeen taagsin xagga galbeed ka xigta, badhna waxay tageen rugta Km. 115, oo bariga (4 Km) ka xigta magaalada.

Dhibaato badan ayaa lagala kulmay sidii looga qaxi lahaa magaalada Beletweyne. Intii aanay arrintu aad u xumaan ee weli ay baabuurtu soconaysay magaalada dhexdeeda, iyaga (oo aan ku fillayn daad-gureynta alaabtii hoos tiil guryihii Beletweyne) ayaa wax lagu daldali jiray. Ayaamihii dambe biyihii way soo bateen, jooggoodu suuqa dhexdisa wuxuu gaaray laba mitir; waxayna yeesheen, meelaha qaarkood, xoog ay ku qaadi karaan xataa baabuurta. Markaas kaddib, waxaa loo leexday in wax lagu daadgureeyo dhowr doonyood oo gurmad ahaan loo keenay; iyo doonyo gurmad ahaan loo sameeyey: waxay ahaayeen kuwa laga sameeyey tenaag saf-saf laysugu xidh-xidhay, ama tiirar laysku xidh-xidhay.

Gaadhi-dameerka ayaa qayb weyn ka qaatay suurogelintii daadgureynta Beletweyne. Runtii wuxuu noqday gaadiid u dhexeeya ka biyaha iyo ka berriga: wuxuu awoodayey in uu dhexmaro biyo luqunta u jooga. Aad ayaa loogaga faa'iideystay daadgureyntii — Reer Beletweyne, waxay ku baaqeen in gaadhi-dameerka la siiyo Billad sharaf. Intee ayuuse gaadhi-dameer daad laba mitir gaadhay oo magaalo galay ka tari karaa, marka la eego taagtiisa iyo qaadkiisa? Gaadiid xumida dadkaa haysatay ayuun baa waxtarkii gaadhi-dameerka ka dhigtay wax aan la liiaabi karin.

May suurogaleen in magaalada Beletweyne intii ay biyuhu galeen oo dhan laga wada saaro wixii alaab tiil. Dad badan ayaa waxay daad-gureyn kari waayeen dul-saarayey



*Gaadiid biyoodkii lagu daadguraynayey Belet-weyne*



*Bariga magaalada Belet-weyne oo uu daad weyni qaaday gugii 1981*


guryaha ama raar. Marka ay sidaas daadka ugala baxsadaan waxay u bandhigayeen roobka oo isna aan naxariis u geleyn ee ka halleynayey. Markii baro iyo bannaanba ay biyo u diideen reer Beletweyne, waxay arrintoodu u yara ekaatay sidii tii reer Qoomu-Nuux.

Meelaha ay reer Beletweyne uga qaxeen degaankoodii may ahayn qaar soo dhoweynayey; waxay kala kulmayeen dhibaatooyin hor leh. Dadkaa baro-ka-baxay waxay noqonayeen ban-fadhi, degay meelo qoyan, oo maalintiina ay gubto milic, habeenkiina uu qonbojiyo qabow. Waxaa qabsatay la'aan biyo cabitaan, waxa ka lumay habkii wax kala iibsiga, shaqo-maalmeedkii dadka ayaa loo bixi waayey; waxaana mushkilad ku noqotay xafidaaddii wixii ay la soo qaxeen.

Waxaa dadkaas baro-ka-baxay hoy u noqday, wixii helay, waabab aan dugsi iyo hadh la sheegi karo midna lahayn, iyo baco gurmad ahaan loogu geeyey. Ciddii haysatay baabuur weyn, haddii aan hawl gurmad looga kaxaysan, inta ay shiraac saaraan ayey guradiisa hoy ka dhiganayeen. Intii ay reer Beletweyne ka maqnaayeen guryahooda, waxaa ka hoy fiicnaa dadkii qaxootiga ahaa ee joogay xerada ku meel gaarka ee deriskooda ahayd.

Dadkii isbitaallada laga soo daad-gureeyey ayaa bannaan wadhnaa. Waxaa la arkaayey hooyooyin gegi bannaan ku umulaya oo go' lagu dedayo.

Ka qaxidda Beletweyne, waxay keentay in maamulkii (Xafiisyada) magaaladu lumo, sida kii qoyskuba uu u lumayey. Xafiiskii Boosaha iyo Isgaarsiinta, ayaa ugu riiq dheeraaday oo isagu aan marna hawshiisii caadiga ahayd wada joojin, intii kale waxay noqotay wax hab gurmad isu rogay iyo wax irridaha loo xidhay ama inta alaabtiisiiba la xidhxidhay daadgureynta raacay. Xaqiiqdii marka ay



*Xarun lagu ururiyey dadkii ay daadadku waxyeeleeyeen qaarkood*

nolosha caadiga ahi is-beddesho, sida xilliga dhul-gariirka ama duufaannada, wa dhici kartaa in maamulku hoos u dhaco, laakiin, siday tahay dad badiba bukay ama cudurro hor lihi ku dhaceen (ama cudur faafaba u halis ahaa) oo ay cunaysay kaneeco darani oo laga xidhay isbitaalkoodii iyo farmashiyadii?

Uma ay adkaysan karayn dadkaa ka qaxay Beletweyne dhaxanta, milicda, kaneecada, biyo-xumida, musqul la'a-anta, asturaad darrida iyo dhibaatooyinka kale ee ku qabsa-day ban-fadhiga, markaa waxay dabo-galeen biyihii oo marba gurigii bannaanaada ayaa isaga oo aan qallalin dib loogu noqnoqonayey. Isla markii daadkii daadkii soconayey ka baxay magaaladii, webigiina hoos u dhacay, welise ay biyo fadhiyaan, ayaa olole lagu qaaday magaaladii: nadiifin, biyo ka saarid iyo buufin. Wixii hoy loogu tegay taagni, iyada oo aan loo eegin ma dumi doonaa iyo maya, ayaa laysku guray inta la xaaq-xaaqday.

Cid waliba waxay isku dayeysay sidii ay hoygeeda suyuca uga saari lahayd. Nasiib-darro, markii wixii hoy tag-gan u tegay ay galeen, waxa cidla is.tubay dadkii ay ka dumeen guryahoodii (218 guri) iyo dad badan oo dhaawaca gaadhay guryahoodii awgii ku hiili waayey in ay ku laabtaan hoygoodii.

Tabaalo naxdin leh, ayaa ka muuqatay dadkii ay biyuhu ka saareen magaalada Beletweyne. Waxa dadka u liciifi-nayey dhibaatada daadadka hoosaynta dhaqankooda maad-diga ah: qalab biyaha layskaga mooso iyo gaadiid (mid berri, mid cir, iyo mid biyoodba) lagaga baxsado oo ku filan midna ma ay haysan. Waxaa la arkayey nooc kasta oo dhibaato ah kana dhalatay daadadka in aan loo heleyn qalabkii lagula dagaallami lahaa oo ku filan. Qof kasta oo arkaa dhibaatadii haysatay dadkaa wuxuu aqoonsan lahaa xaqiiqda belaayada ay daadadkii 1981kii u soo hooyeen ummadda Soomaaliyeed.

Waxaa laga cabsi qabay in meelaha ay daadadku ku burqadeen ee ay biyuhu fadhiisteen ay ka dhashaan cudurro faafa oo xumi, taasina ma ay noqon sidii laga baqayey. waxa gugii 1918kii dalka Soomaaliya oo dhan, gaar ahaan meelihii ay daadadku ku fataheen, ku badatay kaneecada, taas oo dhalisay in meel kasta lagu arko cudurka duumada. Cudurrada ugu badnaa dadkii ay daadadku waxyeelleeyeen waxay ahaayeen duumada, qufaca (bronkiito) iyo shuban; midse dhimasho la majeertaa ka timid ma jirin. Cudur ahaan waxaa dadka meelihii ay fatahaaddu ka dhacday degganaa ugu darraa nafaqo-xumo, taas oo wax laga saarayey afartan iyo laba carruur ah oo muddo gaaban ku geeriyooday Degmada Dujuma.



## LA DAGAALLANKII DHIBAATADA DAADADKA

Kaddib markii muddo laba bilood iyo badh ahba lagula dagaallamayey dhibaatada fatahaadda webiyada iyo roobabka awood heer degmo iyo gobol (abaabul ahaan) lana arkay in aanay gobolladu ku fillayn dagaalkaas, ayaa qaran ahaan loogu kacay wax ka qabashada arrintaas. Bishii Maajo 3dii, 1981kii, ayuu Madaxweynaha J.D.S., isaga oo arkay culayska ay leedahay dhibaatada daadadku iyo riiq dheeraanteedaba, amray dhisidda Guddi Sare oo heer Qaran ah oo hab gurmad ugu hawl-gasha wax ka qabashada arrinta daadadka.

Guddigaas oo isla Maajo 3dii la dhisay laguna magacaabay «Guddiga Qaranka ee Gurmadka Fatahaadda Webiyada iyo Roobabka», wuxuu Madaxweynuhu ugu horreyntii u xilsaaray fulinta arrimahan:

1. In uu si joogto ah ula socdo hawlaha la xiriira fataha biyaha webiyada.
2. In uu hàbeeyo oo u gudbiyo hay'adaha shaqo ahaan Qaranka ugu xilsaaran wixii baahi ah ee degdeg ah oo ka soo baxa goobaha biyuhu ay ka fataheen.
3. In uu derso kana sameeyo tiro koobyo iyo faahfaahinno xaddidan kharajka loo baahan yahay, si loo xalliyo dhibaatooyinka daadadka.
4. In uu adduunka iyo dadweynaha Soomaaliyeed, si tifaftiran ugu bandhigo waxyeellada daadadku geysteen iyo noocyada gargaarka loo baahan yahay.
5. Habaynta iyo ururinta kaalmada loo fidinaayo dadka daadadku waxyeelleeyeen.
6. In uu go'aan kama dambeys ah ka gaaro fulinta arrimaha la xiriira ka hortagga daadadkaas webiyada soo fatahay iyo u gurmadka dadkaas tabaalaysan.

Guddiga Qaranka ee Gurmadka Fatahaadda Webiyada iyo Roobabka, waxa Guddoomiye loogu magacaabay Jaalle G/Sare Cabdirasaaq Maxamuud Abuubakar (Xubin Guddiga Bulshada ee G.S.K.), oo madax ka ahaan jiray gurmadkii Abaartii «Daba-dheer», iyo dejentii dadkii ay abaartaasi waxyeelleysay (Danwadaagaha), ahaana Guddoomiyaha Guddiga Dhexe ee Ololihii Horumarinta Miyiga (hirgelintii qoristii Af-Soomaaliga) 1972-74kii.

Guddigu wuxuu lahaa Guddoomiye Ku-xigeen iyo Xubno ka kala socday toddaba iyo toban Hay'adood oo Dawladda ka tirsan; kuwaas oo loo arkay mid walba baahi la xidhiidhka arrinta daadadku ay khuseyso.

Guddiga Sare ee Gurmadka, si uu hawlihiisii gurmadka u fuliyo, waxa loo sameeyey Guddi-hoosaadyadan ka kala tirsanaa Hay'adaha mid walba ku hoos ku qoran:

**B) Guddiga Sahanka iyo ka hortagga dhibaatooyinka:**

1. Wasaaradda Beeraha;
2. » Hawlaha Guud;
3. » Macdanta iyo Biyaha;
4. » Gaashaandhigga.

**T) Guddiga Badbaadinta iyo Daadgureynta:**

1. Wasaaradda D/Hoose iyo Horumarinta Miyiga;
2. » Caafimaadka;
3. » Gaadiidka Cirka iyo Dhulka;
4. » Kalluunka;
5. Ciidammada Qalabka Sida;
6. Hay'adda Qaxootiga.



**J) Guddiga Isgaarsiinta iyo Taakuleynta:**

1. Wasaaradda W. iyo Hanuuninta Dadweynaha
2. » Boosaha iyo Isgaarsiinta;
3. » Arrimaha Dibedda;
4. Ciidanka Booliiska.

**X) Guddiga Maamulka iyo Taakuleynta:**

1. Wasaaradda Ganacsiga;
2. Wasaaradda Maaliyadda;

**Kh) Guddiga Xoghaynta iyo Dokumentiyaasha:**

1. Wasaaradda D/Hoose iyo Horumarinta Miyiga;
2. Wasaaradda Qorshaha Qaranka.

Isla markii la dhisayba Guddiga Sare ee Gurmadku, wuxuu bilaabay hawlihiisii. Wuxuu shirkiisii koowaad isugu yimid Maajo 4dii, 1981kii, saddexdii toddobaad ee horeba, waxay shirkaasoo kale isugu iamaan jireen galab kasta 5ta (shanta galabnimo). Guddigu wuxuu bilaabay abaabul gurmad heer Qaran ah oo isku xidha goobaha ay waxyeellada daadadku ku dhacaysay iyo magaalo madaxda dalka (Muqdisho) iyo adduunkaba.

Hawlihii ugu horreeyey ee ugu muhiimsanaa ee uu ku dhaqaaqay Guddiga Qaranka ee Gurmadka Fatahaadda Webiyada iyo Roobabku, waxa ka mid ahaa sidii loo xallili lahaa go'doonkii ka dhashay go'iddii Waddada Johar-Buuloburte. Muddo gaaban ayey ku fureen Waddadii ku meel gaarka ahayd ee loogu wareegay tan xidhantay. Waxay gaadiidkii marayey waddada oo aad u badnaa, ayna ka mid ahaayeen qaar gurmad ahaan u socday, oo wax u geysteen u siday dadkii ku waxyeelloobay Hiiraan oo ay ku jireen Qaxootigu, u sameeyeen meelo laga qaato shidaal iyo meelo kii xumaada lagu sameeyo.



*Guddigii Sare ee Fatahaadda oo ka xaajoonaya arrinta daadadka*

Safiirradii ajnabiga ee joogay dalka ayaa loo qaban-qaabiyey safar ay ku soo indho-indheeyaan goobaha daad-adku waxyeelleeyeen. Waxaa iyana meelahaa la geeyey Weriyeyaal. Waxaa la qabtay shirar jaraa'id oo lagaga warra-mayo waxyeellada ay daadadku u geysteen dadka Soomaa-liyeed. Waxyaalahaasina waxay ka mid ahaayeen shaqooyinkii uu ku dhaqaaqay Guddiga Qaranka ee Gur-madka Fataha Webiyada iyo Roobabka.


Waxaa la faray gobolladii ay ka socotay dhibaatada daadadku in ay soo gudbiyaan war-subaxeed joogto ah oo ay si buuxda ugaga warramayaan xaaladda daadadka ee gobolkaa. Waxaa laysku deyaayey in gobol waliba baahida degdegga ah ee uu soo sheegto si degdeg ah wax looga qabto haddii la kari karo. Waxaa la hawl-geliyey qalab kasta oo looga baahnaa shaqada gurmadka la dagaallanka daad-adka. Dalka oo markiisii horeba ku jiray xukun degdeg ah, ayay haddana amarrada gurmadku sii noqdeen qaar xasaasi ah. Guddiga Sare ee Gurmadka ayaa waday abaabulka gur-mad oo ahaa «Degdeg wax ku qabo».

Markii ay soconaysay fatahaaddu waxa gobollada dalka oo dhan ku joogay kormeed madaxda G.S.K. Waxaa isagu si aan kala go' lahayn u tegi jiray meelaha ay dhibaatadu ka taagnayd Guddoomiyaha Guddiga Sare. Taas ayaa ka sii dhigeysay hawsha gurmadka mid aan debcin. Qaranka oo dhan ayaa heegan u ahaa arrinta fatahaadda oo aan waxna ka hagranayn. Hawsha gurmadkuna, waxay ku socotay go'aamin iyo fulin degdeg ah.


Gargaarkii gurmad ee ay dawladda iyo shacbiga Soom-aaliyeed bixinayeen iyo kii adduunkaba waxaa qabanayey Guddiga Qaranka ee Gurmadka. Waxa gargaarka loogu kala dirayey goobaha looga baahnaa si degdeg ah, inkasta oo ay jireen gaadiid-xumo iyo go'doon dib u dhigayey socodka gargaarka. Qaybinta gargaarka waxa loo eegayey sida loogu kala baahan yahay.



Madaxweyne Ku-Xigeenka labaad ee J.D.S., Jaalle Kulmiye (usha sita), iyo Guddoomiyaha Guddiga Sare ee Gurmadka, Jaalle Abdirisaaq (koofiyadda sita), oo kormeer ku tegey Xarun loo dhisay dadkii ay daadadku waxyeeleeyeen



Kormeerkii Xubnaha G.S.K. ee goobaha fatahaadda Jaalle Geelle (doonta gelaya)



Madaxweynha J.D.S., Jaalle Siyaad, oo kormeer ku tegey goobihii ay daadku ku fataheen

Waxaa lagu gudbinayey gargaarka dalka gudihiisa dayuurado, baabuur iyo doonyo lagu geynayey meelaha go'doonsdan. Waxaa aad loogu dadaalayey inaanu gargaarka gurmadku seegin ciddii loogu talo galay, marnaba si khaldan ama isweydaarsi ah loo isticmaalin.

Isla markii ay bilaabantay fatahaadda webiyaduba waxaa lagaga dhaqaaqay gobolladii iyo degmooyinkii ay ka dhacday arrintaasi dagaal lagaga hor-tegayey daadadka. Waxaa la sameeyey Guddiyo Gurmad oo qabta hawlaha kala duwan oo la xidhiidha arrinta daadadka. Guddiyadaas, waxaa markii dambe loo habeeyey sidii Guddiga Sare ee Gurmadka. Guddiyadaas gobollada iyo degmooyinku, waxay mar kasta wadeen abaabul firfircoon oo ay ku socodsiinayaan hawsha la dagaallanka daadadka.

Aad ayey u ballaadhnayd hawsha ka hortagga daadadka ee ka socotay gobollada iyo degmooyinka. Waxaa lagu dadaalay in si joogto ah loola socdo meelaha ay webiyadu ka fatahaan. Dadka ay daadadku waxyeelleeyaan ayaa la daadgureynayey lana taakulaynayey. Meelaha ay webiyadu ka jabaan ayaa laysku deyaayey in la xidho. Daadadka soo abbaara meel muhiim ah sida jid, beero iyo degaanno, ayaa moosas loo dhigayey. Sidii wax loo gaadhsiin lahaa meelaha go'doomay ayaa iyana la waday.

hawlaha ugu kululaa ee lagaga hortagayey waxyeellada daadadka waxaa ka mid ahaa xidhidda meelaha ay webiyadu ka jabaan. Faraha jabay, oo qaarkood ballaadhkoodu gaadhayey ilaa laba boqol oo mitir, biyuhuna ay si xoog leh uga baxayaan ayaa halkii ay ka soo jabsadeen derbigii webiga tiirar laga taagayey; tiirarkaas ayaa lagu xidhayey sarab; dabadeedna, waxaa la dhinac dhigaayey jawaanno ciid ah. Haddii intaa lagu guuleysto, waxaa kaddib lagu kabbisayey ciid. Dhismaha noocaas ahi dhowr meelood wuu ka hirgalay oo waa la xidhay faro doora; waxaase jirtay in aan midna si hawl yar oo ay tallaabo waliba toos u hirgashay lagu dhisin.



faro badan oo laysku dayey in la xidho intii ay biyuhu ka socdeen oo laga caal-waayeyna waa jireen — marka dhismaha in la dhigoba daadka ayaa qaadayey. Halis ayey u ahaayeen dadka sameynayey dhiskaasi in daadku la tago.

Joojinta daadadka, xidhidda faraha, waxa hawl ahaan aan ka dhacayn iska moosidda daadadka. Marka uu daad soo abbaaro meel degaan ah, waxaa la sameynayey in la hor dhigo moos. Hadduu kaa soo dhaafo, waxaa loo dhigayey mid kale, sidaas ayaanay ku soconaysay ilaa la joojiyo ama laga caal waayo oo uu daadku mid kasta soo jabsado.

Meelaha qaarkood daad baahsan ayaa ku soo ekaanayey una baahanayey moos dhowr boqol oo mitir dherer le'eg. Qalabka loo haystay moosidda iyo moosaska loo baahnaa ayaan is-lahayn oo qalabku hooseeyey. Yaraanta carro-tuurka awgeed, ayuu xitaa inta badan daadku u soo jabsanaayey moosaska. Moosaskaa waxa laga sameynayey ciid, jawaanno ciid lagu buuxiyey — sahal may ahayn sida lagu helaayey ciid qallalan oo ku wanaagsan moosidda iyo jawaannadaba — iyo dhagax.

Waxaa hawl ahaan iyo khatar ahaanba iyana la yaab lahayd badbaadintii dadka. Daadad ayaa ku jabayey meelo degaanno ah; waddadii ay dadka meelahaa ku nooli soo mari lahaayeenna sii xidhayey oo dadka go'doon ka dhigayey. Dadkaa iyo hantida ay haysteen waxaa inta badan soo daadguraynayey doonyo yaryar. Ama dad kale ayaa intay biyaha, oo meelaha qaarkood laabta u jooga, dhex jibaaxaan wax ka soo daldalayey meelahaa lagu go'doomay. Inta jeer ee dad gurmad u socday oo rabay in ay wax soo daad-gureeyaan iyagii loo gurmaday ayaan xad lahayn.

Dadka ay daadadku baro-ka-bixiyeen, gaar ahaan kuwa tuulooyinka, wixii la soo ururin karo, waxaa laysugu keenayey meelo; halkaas oo lagu siinayey wixii gargaar loo heli




*Ciidammo gurmad oo u socda badbaadin dad*




*Daadguraytii dadkii ay daadadku waxyeeleeyeen*



*Jawaanno ciid lagu buuxiyey iyo silig ayaa aad loogu isticmaalay joojinta daadadka*



*Daad weyn oo uu moos yari ka hayo beer weyn*



*Meel uu webigi (xagga soke) ka jabay oo la xidhayo*

karo. Waxaa loo dhisaayey teendhooyin intii ay dalka soo gaadheen teendhooyinkii caawimaadda ahaa. Waxaa la siinayey busteyaal (kuwii caawimaadda) iyo cunto. Waxaa loo geynayey daawooyin iyo shaqaale caafimaad.

Hawsha badbaadinta dadku, waxay ahayd mid ilaa halkii ay ka soo bilaabantay ay ku noqoto aan istaageyn. Dad nabad u deggan meel ayey daadad ugu gelayeen. Way ka baxayeen. Waxaa loo daad-gureynayey meel la dejiyo. halkaas ayaa lagu xannaanenayey. Marka ay daadadku joogsadaan ayaa halkii laga soo raray, oo markaan loo arko in ay nabadi ka jirto dib loogu celinayey.

La dagaallanka dhibaatada daadadku wuxuu ahaa mid aan loo kala hadhin. Waxaa jiray abaabul heer qaran, gobol iyo degmo ahaa oo ay hoggaaminaayeen guddiyo gurmad oo ay dawladdu sameysay. Waxaa jiray qalab iyo dad si joogto ah uga shaqeyn jirey hawsha la dagaallanka daadadka. Intaa waxaa dheeraa dadweynaha caadiga ah oo iska ahaa heegan mar walba xoog iyi xoolaba ula diyaar ah in uu wax ka qabto arrinta daadadka. Gaadiidka ugu badnaa ee lagu shaqeynayey wuxuu ahaa ka dadweynaha; xoogga ugu badnaa ee lagu shaqeynayeyna wuxuu ahaa ka dadweynaha oo tabarruc ahaa.

Ciidammada Qalabka Sida, ayaa si laxaad leh ugu hawl galay wax ka qabashadii dhibaatada daadadka ee 1981kii; marka ay ku duulayaan ama ay ka soo noqonayaan hawsha daadadka waxaad moodeysay in ay ku jiraan heegan dagaal, in kasta oo aanay qoryo sidan.

Waxyeellada daadadka ee ku bilaabantay dalka bishii Maarso 1981kii, socotayna ilaa bishii Juun, khasaaraha ay keeneysay ka sokow, waxaa ku baxayey kharaj badan oo lagu gelayey la dagaallankeedii.



Ciidammada Gurmadka oo samaynaya moos



Xoogga Dalka oo wada hawl joojin daad



Xoogga Dalka oo u socda hawl gurmad
xilligii fatahaadda



Xoogga Dalka oo wada daadgurayntii dadkii
ay daadadku waxyeelleeyeen



*Xarun loo dhisay dadkii ay daadadku barokabixiyeen*



*Goob lagu daaweynayo dadkii ay daadadku barokabixiyeen (Wanle-weyn)*

Kharajkaa baxaayey wuxuu baajinaayey khasaare ka badnaan lahaa inta kharaj ahaan u baxaysay. Kharajyada la galay waxaad arkaysaa in ay ahaayeen qaar ku yaraa hawsha lagu qabtay; tusaale wacan waxaa ah xoogga dadka sida joogtada ah uga shaqaynayey hawsha la dagaallanka daadadka oo qofkiiba shaqo maalmeeddiisa, kharaj ahaan, lagu qiimeeyey labaatan Shilin (Sh. So. 20/—).

Kharajka ugu badan ee ku baxayey la dagaallanka daadadku, wuxuu ahaa shidaalka ay isticmaalayeen gaadiidkii loo kaashanayey wax ka qabashada dhibaatada daadadka. Cagafyo ayaa daadadka moosayey, waddooyin bannaynaayey ama hawlo kuwaas la xidhiidha qabanayey. Baabuur badan ayaa loo isticmaalayey gurmad ahaan: wax baa lagu daadgureynayey, ciid ayaa lagu daldalayey si meel loogu mooso, hawlaha kale ee gurmadka ayaa lagu fulinayey.

Dadka ka shaqaynayey goobaha ay ka socdeen hawlaha gurmadku waxay isticmaalayeen cunto loogu keenayey goobahaas; cuntadaas inba waxaa laga soo qaadayey meeshii laga heli karo. Waxaa la isticmaalayey jawaanno wax lagu mooso. Waxaa la soo qaadayey alaabooyin looga baahnaa hawlaha gurmadka. Kharajyo badan oo sidaa isu biirsaday ayaa baxaayey.

Kharaj kasta oo baxa wuxuu sugayey in la helo ciddii bixin lahayd. Waxaa badiba galayey kharajkaas hay'adaha dawladda. Si ay u sugaan xisaabtiisa ayey hay'adahaasi kharaj kasta oo ay galaan ka reebayeen dokomentiyo caddaynaya sidii uu ku baxay. Kharajyada la gelayey waxa la tirsanayey uun kuwa muhiimka ah ee tooska ah. Hay'adaha dawladda qaar baan xisaabsanba kharajyo ay ku galeen hawlaha la dagaallanka daadadka oo u arkayey sidii hawshoodii caadiga ahayd, inkasta oo aanay ahayn qaar qaabbilsanaa masaa'ibka. Dadweynuhuna maba tirsanayn kharaj uu ku galay daadadka awgood.

Haddaba, si loo ogaado inta ay dhammayd waxyeelladii daadadku, loona helo qiimaha dhabta ah ee khasaarihii ay geysteen daadadku, iyo kharajkii ku baxay la dagaallankii dhibaatada daadadka, ayuu Guddiga Sare ee Gurmadku, markay u muuqatay in ay joogsadeen daadadkii, magacaabay guddi gaara oo si xaqiiq ah u soo baadha arrintaas. Guddigaas oo lagu magacaabay «Guddiga Qiimeynta», waxaa Guddoomiye loogu magacaabay Jaalle ka tirsan Guddiga Sare ee Gurmadka. Guddigu waxay ahaayeen Jaallayaasha hoos ku qoran oo ka kala socday hay'adaha ku hor qoran:

1. G/le Sare Nuur Xasan Xuseen (C/Booliiska) Guddoomiye;
2. Dr. Maxamuud Xaaji Salaad (W.Q.Qaranka) Guddoomiye ku-xigeen;
3. Xuseen Warsame Nuur (W.D/Hoose) — Xubin;
4. Inj. Qaasim Xasan Xuseen (W. Beeraha) — Xubin;
5. Inj. Maxamed Axmed Cilmi (W. H. Guud) — Xubin;
6. Dr. Cabdi Aadan Daahir (W. Maaliyadda) — Xubin;
7. Dr. Cali Sheekh Cumar (W. Caafimaadka) — Xubin;
8. Yuusuf Macallin Maxamed (W. Q. Qaranka) — Xubin;
9. Maxamed Axmed Wacays (W. Q. Qaranka) — Xubin;
10. Cabdullaahi Cumar Faahiye (W. Q. Qaranka) — Xubin;
11. Maxamuud Yuusuf Diiriye (W. Q. Qaranka) — Xubin.

Waxaa loo baahnaa in la soo baadho khasaarooyunkii ay daadadku gaadhsiiyeen dadka, kharajkii lagu galay la dagaallanka dhibaatada daadadkaas, iyo hawlihii iyo waxqabadkii guddiyadii gurmadka iyo dadweynihii gobollada. In la soo derso asbaabihii keenay fatahaadda webiyada iyo roobabkii



badnaa; iyo in la soo sameeyo talooyin ku salaysan wax ka qabadka loo baahan yahay ee waxyeellooyinka dabeecadda. Intaasna waxaa loo xilsaaray Guddiga Qiimeynta.

Guddiga Qiimeynta, si uu hawlihii loo xilsaaray u fuliyo wuxuu tegay goobihii ay daadadku waxyeelleeyeen. Hawsha ugu muhiimsanayd ee uu Guddigu u socday waxay ahayd in uu soo baadho khasaarihii ay daadadku geysteen iyo kharajkii ku baxay la dagaallankooda.

Markii uu tago Guddiga Qiimeynta, degmooyinkii ay daadadku waxyeelleeyeen, wuxuu dadka ka codsanayey in la tuso meel kasta oo uu khasaare ka dhacay. Madaxda degmooyinka, ama gobolladaba, ayaa Guddiga dultaageysay meelaha ay aragtidooda codsadeen. Guddigu markaa wuxuu qiyaasayey khasaaraha meeshaa gaadhay inta uu le'eg yahay.

Guddigu marka uu soo dhammeeyo indho-indheynta ayuu dabadeed madaxda gobollada, oo iyagu hore u sii qiimeeyey waxyeellada gaadhay, kaddib markii ay maqleen in loo soo diyaariyo Guddiga Qiimeynta u socda, kala munaaqishoonayeen inta uu dhan yahay khasaarahoodu iyo sida loo qiimeynayaaba.

Waxaa jiray waxyaalo khasaaroobay oo ay madaxda gobollada iyo degmooyinku uga war-roonaayeen qiimeyntooda Guddiga Qiimeynta, iyo lidka taa. Wax kasta oo qiimigiisa aan laysla aqoon waxa loo qiimeynaayey si macquul ah oo laga ilaaliyey faahfaahinta Guddiga Qiimeynta ayaa isagu mabda' ahaan ka soo horjeeday naaxnaaxinta khasaarooyinka, si aan xaqiiqda looga tallowsiin. Wixii laysla yaqaan qiimigiisa, waxa laga dhigaayey sidiisii.

Ballaca beeraha guud ahaan degmo walba ka baaba'ay iyo tirada guryaha waxyeelloobay (meelaha ay guryaha baaba'ay ku badnaayeen) ayuu muran ku dhexmarayey Guddiga Qiimeynta iyo madaxda meelahaas. Beletweyne oo

kale hal-hal looma tirin karin guryaha waxyeelloobay, waayo, qaar baabuu daadkii la tegay; tuulooyin badan oo sidaasoo kale ahina waa jireen.

Dhulkii ay beeruhu, siiba kuwii galleyda, meseggada, iwm, ka baaba'een qaar baa dib loo beeray, qaarna caws baa ka baxay, markaas meelaha sidaas ah way adkayd in la kala saaro in ay hore u beerreyd oo ay daadadkii gooyeen iyo in kale; waxaase Guddiga Qiimeyntu hubinaayey in meeshaa daad weyni galay iyo in raad beer hore oo ay daadadkii jareen ka sii muuqdo.

Marka ugu horreysa ee ay kulmaan Guddiga Qiimeynta iyo madaxda goobaha waxyeelloobayba wuxuu Guddigu ka dhaadhicinayey madaxda inaan waxba la buunbuunin, natiijadooduna sidaas ayey noqonaysay. Wax kasta oo la qiimaynayo waxaa la waafajinaayey uun sharciga ah yaan la baqsin lana buunbuunin.

Si uu u ogaado una garawsado, waxay madaxda degmooyinka ay waxyeelladu ka dhacday soo hor dhigayeen Guddiga Qiimeynta dokomentiyo muujinaaya kharajkii baxay. Guddigu kumaysan qancayn uun dokomentiyadaa ee waxay eegayeen, tii la arki karo, hawshii uu kharajkaasi ku baxay; haddii loo sheego tiro jawaanno ah oo loo isticmaalay moosid, waxay Guddiga Qiimeyntu tegayeen halkii lagu moosay, si ay u hubiyaan in ay suura gal tahay in intaa oo jawaan lagu isticmaali karo meeshaa. Kharajka ku baxay hawl aannu raadkeedii si cad u sii muuqan, sida cunto dadkii shaqaynayey intii ay hawsha gurmadku degmadaa ka socotay, hawsha guud ahaan la qabtay iyo wax la mid ah.

Guddiga Qiimeyntu muu ahayn koox hanti-dhawr ah, kamase taganayn. Waxa aan macquulka ahayn cidda wadata kuma uu xidhayn, kamana qaadanayn. Wuu oggolaanayey wixii macquul ah, wax kastase in la taataabsiiyo ayuu jeclaa. Aad ugumuu dhabbo geleyn dokomentiyada muujinayey



kharajyada, wuxuuse eegayey in ay yihiin qaar sharciyeysan waxa ay ku baxeenna yihiin macquul, shaqada gurmadkuna waxay ahayd mid aan caadi ahayn.

Kaddib markii uu Guddigii Qiimeyntu soo dhammaysdtay hawlihiisii baadhista khasaarooyinkii iyo kharajyadii, ayuu si rasmi ah Guddiga Sare ee Gurmadku u soo saaray qiimeyn muujinaysa khasaarihii iyo kharajyadii degmooyinkii iyo hay'adaha dawladda. Khasaaraha degmooyinku wuxuu isugu jiraa mid dawladeed iyo mid dadweynaba. Waxaa jira khasaarooyin aan la soo qiimeyn sida xoolaha (Lo'da, Ariga iyo Digaagga) ee ay daadadkii dileen oo tiradooda oo aan badnayn awgeed loo dhaafay. Kharajka aan tooska ahaynna lama soo xisaabin.

## QIIMAYNTII
## QIIMAYNTII GOBOLKA JUBBADA HOOSE

I) Degmada Kismaayo:

| Waxa khasaaroobay | Qiimaha Sh So. |
|---|---|
| 1. Waxaa baaba'ay 4.500 hektaar oo galley ah, lagana filayey 36.000 Kiintaal (X Shso. 180 Kiintaalkiiba) | 6.480.000.- |
| 2. Guryo ku waxyeelloobay toddoba tuulo oo ay daadad galeen, ayna ku noolaayeen 1735 qoys, waxaa lagu qiyaasay | 347.000.- |
| Wadar Shso. | 6.827.000.- |

II) Degmada Jamama

| | |
|---|---|
| 1. Waxaa baaba'ay 24.620 hektaar oo galley ah,lagana filayey 200.000 kiintaal (X Shso. 180 Kiintaalkiiba) | 36.000.000.- |
| 2. Waxaa iyana baaba'ay 273.70 hektaar muus ah. waxaana lagu qiyaasay | 5.871.180.- |
| 3. Siddeed Kannaal oo waxyeelloobay dhererkooduna ahaa 5.900m, dib u hagaajintooda waxaa lagu qiimeeyey | 12.152.- |
| 4. b) Jidka Kamsuuma - Jilib waxaa go'ay 2km. iyo laba buundo oo biyo mareen ah oo waddada hoosteeda ahaa, dib u hagaajintoodana waxaa lagu qiimeeyay | 3.160.000.- |
| t. Jidka Araare - Jamaame waxa go'ay garbaha jidka qiyaas ah 2.5 km. dib u hagaajintoodana waxa lagu qiimeeyey | 348.000 |



| | |
|---|---|
| 5. Jidka tuulada Shangaani - Kamsuuma oo ay daadad dulmareen dhaawac weynina gaaray dib u hagaajintiisa waxaa lagu qii-meeyey | 1.500.000.- |
| 6. Lix tuulo oo ay daadad galeen ayna ku noolaayeen 400 qoys, waxyeellada gaadhay guryahooda waxaa lagu qiimeeyey | 80.000.- |

KHARAJ

| | |
|---|---|
| 7. Qalabka (sida saamooyinka iyo baldoosarrada) iyo gaadiidka wax qabadkoodii gurmadka waxaa lagu qiimeeyey | 2.840.000.- |
| 8. Hawsha gurmadku waxay si xoog leh u socotay 20 cisho, waxa si joogto ah u shaqeynayey 3000 oo qof waxaa dadkaa qofkiiba hawlmaalmeedkiisa lagu qiimeeyey Shso. 20/- qiime guudna wuxuu noqday | 1.200.000.- |
| 9. Gaadiidka ku waxyeelloobay hawlaha gurmad oo tiradiisu ahayd soddon (30) dayactirkooda waxa lagu qiimeeyey | 202.521.- |

10. b) Kharajyo loo galay hawlihii gurmadka (Gobolka Jubbada Hoose) laguna talo galay inuu bixiyo Guddiga Sare ayaa kala ahaa:-

| | |
|---|---|
| — Shidaal | 135.366,54 |
| — Raashin | 67.301,80 |
| — Jawaanno faaruq ah iyo silig | 236.500,00 |
| — Jiif iyo cunno martiyeed (Hotel Waamo) | 87.266,00 |
| — Boosaha iyo Isgaarsiinta | 3.612,40 |
| Wadar .... | 530.046,74 |

t) Kharajyo iyana loo galay hawlaha gurmadka (sida kuwa "b") lagase bixiyey Gobolka ayaa dhammaa — 972.813,05

## GOBOLKA JUBBADA DHEXE

I) Degmada Jilib

| Waxyaalaha khasaaroobay | Qiimaha Shso. |
|---|---|
| 1. b) Waxa baaba'ay 19.249 hektaar oo galley ah oo ay lahaayeen dad shacbi ahi lagana filayey 153.992 Kiintaal (X Sh So. 180 halkii kiintaalba) | 27.718.560,00,- |
| t) Waxaa iyana baaba'ay toban hektar oo galley ah lagana lahaa Mashruuca Faanoole, lagana filayey 80 kiintaal (X Shso. 180 halkii kiintaalba) | 14.400.- |
| j) Waxaa baaba'ay 400 hektaar oo qasab ah (Mashruuca Sonkorta Mareerrey) lagana filaayey 32.000 kiintaal (X Shso. 171,25 kiintaalkiiba) | 11.880.000.- |



| | |
|---|---|
| 2. Waxay waxyeello gaadhay toddoba kanaal dhererkooduna ahaa 10.000 mitir, dib u hagaajintoodana waxaa lagu qiimeeyey | 360.000.- |
| 3. b) Waddada Jilib-Maleenda (Jaay) waxay ka go'day saddex meelood oo isugeynteeddhererkoodu ahayd 400 m. dib u hagaajinteedana waxa lagu qiimeeyey | 34.000.- |
| t) Jidka Faanoole (Mashruuca)-Kamsuuma (Jaay) waxay waxyeello gaadhay afar kiilomitir, dib u hagaajintoodana waxa lagu qiimeeyey | 1.200.000.- |
| 2. Guryo ku dumay ama ku waxyeelloobay afar iyo labaatan tuulo oo ay biyo galeen, dib u hagaajintooda waxa lagu qiimeeyey | 640.800.- |

KHARAJ

| | |
|---|---|
| 5. Qalabka (sida saamooyinka iyo baldoosarrada) iyo gaadiidka wax qabadkoodii waxaa lagu qiimeeyey | 1.832.400.- |
| 6. Hawsha gurmadka oo si xoog leh u socotay labaatan maalmood, waxa si joogto ah intaba uga shaqeynayey 3000 oo qof, kiiba hawlmaalmeedkiisa waxa lagu qiimeeyey Shso. 20; qiimiga guudna wuxuu noqday | 1.200.000.- |

7. Wax qabadkii gurmad ee mashruuca Faanoole oo aanay ku jirin waxyeellada qalabka iyo gaadiidka ay ku shaqeynayeen, waxa lagu qiimeeyey — 606.000.-

KHARAJ

8. Kharajyo dhowr ah oo ku baxay la dagaallankii daadadka ayaa kala ahaa sidan:-

| | |
|---|---|
| — Shidaal | 85.828,05.- |
| — Raashin | 37.880,00.- |
| — Jawaanno iyo silig | 154.880,00 |
| — Jiif iyo cunto huteel | 14.220,00.- |
| — Wadar | Shso.292.678,05 |

Degmada Bu'aale.

| Waxyaalaha khasaaroobay | Qiimaha Shso. |
|---|---|
| 1. Waxa ay daadadkii baabi'iyeen 12.500 hektaar oo galley ah, lagana filayey 100.000 kiintaal (X Shso. 180 kiintaalkiiba) | 18.000,00.- |
| 2. Shan kannaal oo dhererkoodu ahaa 30.000m iyo shan iyo toban baratooyo ayaa waxyeeloobay; dib u sameyntoodana waxaa lagu qiimeeyey | 250.000,00.- |
| 3. Buundada Bu'aale ayay waxyeello gaadhay, dayactirkeedana waxaa lagu qiimeeyey | 50.000,00.- |

KHARAJ

4. Qalabka iyo gaadiidka waxaa lagu qiimeeyey waxqabadkoodii. — 730.800,00.-



5. Hawsha gurmadka oo labaatan cisho si aad ah u socotay, waxaa si joogta ah uga shaqeynayey intaaba 2000 oo qof. Waxaa lagu qiimeeyey hawlmaalmeedda qofkiiba labaatan shilin. Qiimaha guudna wuxuu noqday. — 800.000,00.-

6. b) Kharajyo loo galay hawsha gurmadka daadadka awgeed ayaa kala ahaa sidan:-

| | |
|---|---|
| — Jawaanno | 33.000,00.- |
| — Raashin | 29.777,95.- |
| — Kharajyo yaryar oo laysku daray | 4.046,80.- |
| Wadar | 67.789,75.- |

t. Waxaa jiray kharajyo ay gurmadka awgii u galeen hay'adaha dawladda qaarkood iyo dadweynaha oo degmada dhexdeeda laga bixiyey halka kharajka 6, b lagaga qoray Guddiga Sare - dhammaana. — 53.320,00.-

III) Degmada Saakow

| Waxyaalaha khasaaroobay | Qiimeynta Shso. |
|---|---|
| 1. Waxay daadadku baabi'iyeen 3000 hektaar oo galley ah, lagana filaayey 24.000 kiintaal (X Shso. 180 kiintaalkiiba) | 4.320.000,00.- |
| 2. Waxaa go'ay siliggii iyo shubkii doonta webiga lagaga tallaabayey; dib u hagaajintooduna waxa lagu qiimeeyey | 23.000,00.- |

| | |
|---|---|
| 3. Guryo ku waxyeelloobay saddex tuulo oo ay daaad galeen ayna ku noolaayeen afartan iyo shan qoys, dib u sameyntooda waxaa lagu qiimeeyey. | 9.000,00.- |

KHARAJ

| | |
|---|---|
| 4. Qalabkii (cagafyo) iyo gaadiidkii loo adeegsanayey la dagaallanka daadadka waxqabadkoodii waxaa lagu qiimeeyey. | 90.000,00.- |
| 5. Waxa si joogto ah, labadatan maalmood oo ay hawsha gurmadku si kulul u socotay, u shaqeynayey 1000 qof. Midkiiba waxaa hawlmaalmeedkiisa lagu qiimeeyey labaatan shilin, wadartiina waxay noqotay. | 400.000,00.- |
| 6. Gaadiidka ku waxyeelloobay hawsha gurmadka oo ahaa shan (5) waxa dayactirkiisa lagu qiimeeyey. | 80.000,00.- |

7. b) Kharajyo kala duwan oo loo galay ka hortagga daadadka laguna qoray Guddiga Sare ayaa kala ahaa sidan:-

| | |
|---|---|
| — Shidaal | 15.964,00 |
| — Raashin | 22.050,00 |
| — Isgaarsiin | 1.500,00.- |
| — Jawaanno | 19.800,00 |
| Wadar | 59.314,00.- |

t. Waxa isna jiray kharaj ay dabooshay Degmada o dhammaa 20.500,00





I. Degmada Baardheere

| Waxyaalaha | Qiimeynta Shso. |
|---|---|
| 1. b) Waxaa baaba'ay 1250 hektaar oo galley ah, lagana filaayey 10.000 kiintaal (X Shso. 180 Kiintaalkiiba) | 1.800.000,00.- |
| t) Waxaa iyana baaba'ay 500 hektaar oo meseggo ah, lagana filaayey 800 kiintaal (X Shso. 150 kiintaalkiiba) | 120.000,00.- |
| j) Waxaa kaloo baaba'ay 750 hektaar oo basal ah, lagana rajeynayey 26.250 kiintaal (X Shso. 6 kiintaalkiiba) | 157.500,00.- |
| x) Waxaa iyana baaba'ay 300 hektaar oo tubaako ah, lagana filaayey 4.500 kiintaal (X Shso. 7 kiintaalkiiba) | 31.500,00.- |
| 2. Waxaa waxyeelloobay afartan (40) matoor-biyood dayactirkoodana waxaa lagu qiimeeyey | 200.000,00.- |

KHARAJ

| | |
|---|---|
| 3. Kharaj doora ayaa Iskaashatada Beeraleyda Baardheere kaga baxay la dagaallanka daadadka wuxuuna dhammaa. | 80.000,00.- |

(Kharajka kale ee degmada kaga baxay hawsha daadadka waxaa laysugu qaatay sidii kii caadiga ahaa ama wax caadi ah markaa laysuma duwinba ee waxaa lagu daray kharajkii kale ee caadiga ahaa).

## GOBOLKA HIIRAAN

Degmada Beledweyne

| Waxyaalaha khasaaroobay | Qiimaha Shso. |
|---|---|
| 1. Waxay daadadkii baabi'iyeen 8.000 hektaar oo meseggo ah, lagana filaayey 40.000 kiintaal (X Shso. 150 kiintaalkiiba) | 6.000.000,00.- |
| 2. Waxay waxyeello gaadhay saddex kannaal, dayactirkoodana waxa lagu qiimeeyey. | 10.000,00.- |
| 3. Matoorro dhammaa soddon iyo shan ayaa waxyeelloobay; dayactirkoodana waxaa lagu qiimeeyey. | 350.000,00.- |
| 4. Labo baratooyo oo dhaawacmay, dib u hagaajintooda waxaa lagu qiimeeeyey. | 250.000,00.- |
| 5. b) Waxay waxyeello gaadhay buundada loo yaqaan "Buundo-weyn" ee magaalada Beledweyne dib u hagaajintoodana waxaa lagu qiimeeyey. | 80.000,00.- |
| t. Waxaa isaguna dumey derbigii dhagaxa ahaa ee buundada tuulada Nuur Faarax; dib u hagaajintiisana waxaa lagu qiimeeyey. | 120.375,00.- |
| 6. Waddada Beledweyne Km 115 waxaa burburay laba kiiloomitir; dib u sameyntana waxaa lagu qiimeeyey. | 2.400.000,00.- |



| | |
|---|---|
| 7. b. Magaalada Beledweyne gudaheeda waxaa ka dumey 125 guri, (shan daarood iyo inta kale oo ahayd carshaan iyo mundullo); dib u dhiskoodana waxa lagu qiimeeyey. | 700.000,00.- |
| t. Isla Beledweyne waxaa kaloo ay waxyeello gaadhay 93 guri (saddex iyo toban qol oo saro ah iyo inta kale oo isugu jiray carshaan iyo mundullo); dib u hagaajintoodana waxaa lagu qiimeeyey. | 210.000,00.- |
| 8. Badeecooyin ay kharribeen biyihii galay Beledweyne ayaa loo kala qiimeeyey sidatan:- | |
| — Raashin | 141.221,06; |
| — Daawo | 54.434,00.- |
| — Sigaar | 1.456,00.- |
| — Shidaal | 5.445,00.- |
| Wadar | 202.556,06.- |
| 9. Maacuun, dhar, xaashiyo, kuraas, miisas iyo alaabooyin yaryar oo kale oo ay daadadkii galay Beledweyne halleeyeen ayaa lagu qiimeeyey. | 5.000.000,00.- |
| 10. Shan tuulo oo ay daadad galeen lagana qaxay, ayna noolaayeen 215 qoys, waxyeelladii guryahoodii gaadhay waxa lagu qiimeeyey. | 48.000,00.- |

KHARAJ

| | |
|---|---|
| 11. Waxqabadkii qalabka (Cagafyo) iyo gaadiidka waxaa lagu qiimeeyey. | 1.426.100,00.- |
| 12. Hawsha gurmadka oo soddon iyo shan cisho si kulul u socotay, waxaa si joogta ah uga shaqeynayey 2500 oo qof; kiiba hawlmaalmeedkiisa waxa lagu qiimeeyey labaatan Shilin, qiimaha guudna waa. | 1.750.000,00.- |
| 13. Qalabka (Cagafyo) iyo gaadiidka ku waxyeelloobay hawsha gurmadka oo ahaa shan, dayactirkooda waxaa lagu qiimeeyey. | 76.000,00.- |
| 14. Kharajyo ku baxay hawshii la dagaallanka daadadka ayaa kala ahaa sidan:- | |
| — Shidaal | 184.978,17 |
| — Raashin | 164.167,85 |
| — Maacuun | 2.803,20 |
| — Silig, Xadhko iyo tiirar | 21.860,00 |
| — Boosaha iyo Isgaarsiinta | 3.335.80 |
| Wadar | 377.145,02 |

II) Degmada Buuloburte

| Waxyaabaha khasaaroobay | Qiimaha Shso. |
|---|---|
| 1. b. Waxay daadadkii degmada ku burqaday baabi'iyeen 3200 hektaar oo meseggo ah, lagana rajaynayey 16.000 kiintaal (X Shs. 150 kiintaalkiiba). | 2.400.000,00.- |



| | |
|---|---|
| t) Waxaa kaloo baaba'ay 2000 hektaar oo galley ah, lagana filayey 10.000 kiintaal (X Shso. 180 kiintaalkiiba). | 1.500.000,00.- |
| 2. Saddex matoor oo ay daadadkii waxyeelleeyeen, dayactirkooda waxaa lagu qiimeeyey. | 30.000,00.- |
| 3. Magaalada Buuloburte waxaa ku waxyeelloobay konton guri (toban daarood iyo inta kale oo siugu jirey carshaan iyo mundullo); dib u sameyntoodana waxaa lagu qiimeeyey. | 4000.000,00.- |
| 4. Shan tuulo oo ay daadad galeen, ayna ku noolaayeen 464, qoys, waxyeellada gaadhay guryahoodii waxaa lagu qiimeeyey. | 5.460,00.- |

KHARAJ

| | |
|---|---|
| 5. Waxqabadkii qalabka (Cagafyo) iyo gaadiidka waxaa lagu qiimeeyey. | 387.200,00.- |
| 6. Hawsha gurmadka oo si xoog leh u socotay laba iyo labaatan maalmood, waxaa si joogto ah uga shaqeynayey 700 qof; kiiba hawlmaalmeedkiisa waxaa lagu qiimeeyey labaatan Shilin, qiimaha guudna wuxuu noqday. | 308.000,00.- |
| 7. Qalabka (Cagafyo) iyo gaadiidka ku waxyeelloobay hawsha gurmadka, oo ahaa laba, waxaa dayactirkooda lagu qiimeeyey. | 30.000,00.- |

8. Kharajyo loo galay la dagaallanka daadadka awgii ayaa kala ahaa sidan:-

| | |
|---|---|
| — Shidaal | 65.964,30 |
| — Raashin | 19.461,50 |
| — Jawaanno faaruq ah | 48.239,00 |
| Wadar | 133.664,80.- |

III. Degmada Jalalaqsi

| Waxyaalaha khasaaroobay | Qiimaha Shso. |
|---|---|
| 1. Waxay daadadkii baabi'iyeen 2600 hektaar oo meseggo ah, lagana filayey 13.000 kiintaal (X shso. 150 kiintaalkiiba). | 1.950.000,00.- |
| 2. Saddex guri (daaro) oo ay waxyeello gaadhay, dib u hagaajintooda waxaa lagu qiimeeyey. | 60.000,00.- |
| 3. Waxyeelladii gaadhay guryihii (mundullo) xeryaha qaxootiga degganaa degmada oo ay daadad galeen, lagana daadgureeyey 1800 qoys, waxa lagu qiimeeyey. | 360.000,00.- |
| KHARAJ | |
| 4. Waxqabadkii qalabka (Cagafyo) iyo gaadiidka (baabuur) waxaa lagu qiimeeyey. | 322.500,00.- |
| 5. Waxay si kulul u socotay hawsha gurmadku labaatan cisho; waxaa intaaba si joogto ah u shaqeynayey 300 oo qof; kiiba shaqomaalmeedkiisa waxaa lagu qiimeeyey Shso. 20, qiimaha guudna wuxuu noqday. | 168.000,00.- |



6. Kharaj loo galay la dagaallanka daadadka awgii ayaa kala ahaa sidah:-

| | |
|---|---|
| — Shidaal | 50.069,40 |
| — Jawaanno faaruq ah | 45.000,00 |
| — Dhagax | 35.000,00 |
| — Raashin | 35.129,00 |
| Wadar | 165.198,40.- |

## GOBOLKA SHABEELLAHA DHEXE

I. Degmada Jowhar

| Waxyaalaha khasaaroobay | Qiimaha Shso. |
|---|---|
| 1. b) Waxaa ay daadadkii baabi'iyeen 11.360 hektaar oo meseggo ah lagana filaayey 56.800 kiintaal (X Shso. 150 kiintaalkiiba). | 8.576.800,00.- |
| t) Waxaa kaloo ay baabi'iyeen 8 hektaar oo qasab ah, lagana rajeynayey 256 kiintaal (X Sh So. 906,25 Kiintaalkiiba). | 232.000,00.- |
| 2. Waddada (laamiga ah) Jowhar — buuloburte waxaa burburay lix kooloomitir; dib u hagaajinteedana waxaa lagu qiimeeyey. | 7.200.000,00.- |
| 3. b) Tuulada Diinlaawe, afartan iyo laba guri oo ay daadadkii waxyeelleeyeen, dib u hagaajintooda waxaa lagu qiimeeyey. | 6.000,00.- |

t) Isla Diinlaawe, saddex guri oo dumay dib u dhiskooda waxaa lagu qiimeeyey. 13.800,00.-

KHARAJ

4. Waxqabadka qalabka (Cagafyo) iyo gaadiidka waxaa lagu qiimeeyey. 3.448.400,00

5. Hawsha la dagaallanka dhibaatada daadadka oo si kulul u socotay, soddon iyo shan maalmood, waxaa si joogta ah uga shaqeynayey 500 qof, kiiba hawlmaalmeedkiisa waxaa lagu qiimeeyey labaatan shilin. Qiimaha guudna wuxuu noqday. 350.000,00.-

6. b) Kharajyo loo galay hawsha gurmadka awgeed, laguna qoray Guddiga Sare ayaa kala ahaa sidan:-

| | |
|---|---|
| — Shidaal | 172.612,65 |
| — Raashin | 194.231,25 |
| — Dhagax | 3.000,00 |
| Wadar | 369.843,90 |

t) Kharajyo, Gobolka gudihiisa loona galay hawshii gurmadka ayna bixiyeen Wasaaradaha Beeraha iyo Hawlaha Guud, ayaa kala ahaa sidan:

| | |
|---|---|
| — Shidaal | 43.906,35 |
| — Alaab iyo Raashin | 86.251,00 |
| — Mushahar iyo abaalgud shaqaale ku meelgaar ah | 35.900,00 |
| Wadar | 166.057,35 |



t) Shidaal ay Wasaaradda hawlaha Guud gurmad ahaan ugu soo dirtay hawshii sameynta waddooyinka ku meelgaarka ahaa ayaa ahaa sidatan:-

| | |
|---|---|
| — Nafto | 385.160,85 |
| — Bansiin | 36.671,80 |
| — Olyo iyo garaaso | 8.608,00 |
| Wadar | 430.440,65 |

7. Qalabkii iyo gaadiidkii ku waxyeelloobay hawsha gurmadka waxa lagu qiimeeyey. 101.350,00.-

8. Waxqabadkii qalab iyo farsamo ee ay Warshadda Sonkorta ee Jowhar ka gaysatay hawshii gurmadka waxaa lagu qiimeeyey. 129.608,00.-

II) Degmada Balcad

Waxyaalaha khasaaroobay — Qiimaha Shso.

1. b) Waxaa baaba'ay 233 hektaar oo galley ah lagana filayey 1165 kiintaal (X Shso. 180 kiintaalkiiba). 206.700,00.-

t) Waxaa kaloo ay daadadkii baabi'iyeen 200 hektaar oo meseggo ah lagana filayey 1000 kiintaal (X Shso. 150 kiintaalkiiba). 150.000,00.-

2. b) Afar guri (daaro) oo Balcad ku waxyeelloobay waxaa lagu qiimeeyey dayactirkooda 68.300,00.-

t) Tuulada Wargaabo waxay waxyeello gaadhay afar iyo toban mundullo; dib u hagaajintoodana waxaa lagu qiimeeyey. 2.800,00.-

KHARAJ

3. Kharaj loo galay gurmadka awgeed ayaa kala ahaa sidan:-

| | |
|---|---|
| — Shidaal | 15.170,00 |
| — Carro Kaawo | 22.900,00 |
| Wadar | 38.070,00.- |

## GOBOLKA SHABEELAHA HOOSE

I) Degmada Afgooye

| Waxyaalaha khasaaroobay | Qiimaha Shso. |
|---|---|
| 1. Waxay daadadkii baabi'iyeen 600 hektaar oo galley ah, lagana rajeynayey 3.000 kiintaal (X Shso. 180 kiintaalkiiba). | 540.000,00.- |
| KHARAJ | |
| 2. Waxqabadkii qalabkii (Cagafyo) iyo gaadiidkii ka qayb galay hawsha gurmadka waxaa lagu qiimeeyey. | 171.000,00.- |
| 3. Hawsha la dagaallanka daadadka oo si xoog leh u socotay toban maalmood, waxaa si joogta ah uga shaqeynayey 500 qof, kiiba hawlmaalmeedkiisa waxaa lagu qiimeeyey labaatan shilin. Qiimaha guudna wuxuu noqday. | 150.000,00.- |



| | |
|---|---|
| 4. Shidaal loo isticmaalay hawsha gurmadkaayaa ahaa | 47.986,13.- |
| 5. Jawaanno loogu isticmaalay xidhiiddii farta Daara Salaam oo dhammaa 7800 ayuu qiimahoodii noqday. | 97.450,00.- |

II) Degmada Wanlaweyn

| Waxyaalaha khasaaroobay | Qiimaha Shso. |
|---|---|
| 1. Waxaa ay daadadkii baabi'iyeen 2700 hektaar oo meseggo ah, lagana filaayey 13.500 kiintaal (X Shso. 150 kiintaalkiiba). | 2.025.000,00.- |
| 2. b) Waxaa mashruuca Saliidda iyo Digirta ka baaba'ay 150 hektaar oo lows ah, lagana rajeynayey 900 kiintaal (X Shso. 300). | 270.000,00.- |
| t) Waxaa kaloo ka baaba'ay Mashruuca S. & D. 25 hektaar oo digir ah, lagana filayey 150 kiintaal (X Shso. 600). | 90.000,00.- |
| 3. Waxaa waxyeelloobay laba buundo oo laamiga hoos mara, dib u hagaajintoodana waxaa lagu qiimeeyey. | 80.000,00.- |
| 4. Jidka laamiga ah ee Afgooye — Wanlaweyn, saddex meelood oo dhererkoodu isku yahay 200m ayaa go'ay; dib u samayntoodana waxaa lagu qiimeeyey. | 300.000,00.- |

5. Konton iyo afar tuulo oo uu daad galay, ayna degganaayeen 1940 qoys, guryihii ka waxyeelloobay waxaa lagu qiimeeyey. 388.000,00.-

KHARAJ

6. Waxqabadkii qalabkii (Cagafyo) iyo gaadiidkii ka qayb qaatay hawsha gurmadka waxaa lagu qiimeeyey. 514.500,00.-

7. Hawsha la dagaallanka daadadka oo si kulul u socotay labaatan maalmood, waxaa si joogto ah uga shaqeynayey 250 qof; midkiiba hawlmaalmeedkiisa waxaa lagu qiimeeyey labaatan shilin. Qiimiga guudna wuxuu noqday. 100.000,00.-

8. Dayactirka gaadiidka ku waxyeelloobay oo ahaa labo waxaa lagu qiimeeyey. 30.000,00.-

9. Shidaal loo isticmaalay hawsha gurmadka daadadka ayaa noqday. 199.677,58.-

Waxaa jirey kharajyo ay hay'adaha Dawladda qaarkood u galeen hawlihii gurmadka la dagaallanka dhibaatada daadadka. Kharajyadaa waxay qaarkood ka baxayeen Xarumaha dhexe ee ku yaal Magaala-madaxda dalka Muqdisho. qaarna waxay ka baxayeen gobollada iyo degmooyinka, lagumase soo darin kharajyada ka baxayey gobollada iyo degmooyinka. Kharajyadaa oo loogu



talo galay inuu bixiyo Guddiga Sare ee Gudmadku, una badnaa ijaar qalab (Cagafyo) iyo gaadiid, iyo socodsiinta hawlaha gurmadka ayaa ahaa;

1. Kharaj laga galay Wakaaladda Cagafyada (ONAT) waxaa la isticmaalayey qalabkeeda oo loo galay hawshii gurmadka ee degmooyinka ayaa kala ahaa:-

| | | |
|---|---|---|
| b) | Kismaayo iyo Jamaame | 38.683,00.- |
| t) | Jilib | 45.096,50.- |
| j) | Bu'aale | 62.514,25.- |
| x) | Beledweyne | 109.329,25.- |
| kh) | Buuloburte | 60.000,00.- |
| d) | Jalalaqsi | 25.250,00.- |
| r) | Jowhar | 199.192,00.- |
| s) | Wanlaweyn | 208.563,00.- |
| sh) | Afgooye | 13.736,00.- |
| | Wadar Shso. | 762.364,00.- |

2. Kharaj laga galay Wakaaladda Gaadiidka Qaranka oo la isticmaalayey gaadiid badan oo ay lahayd, loona galay hawlihii gurmadka awgood ayaa ahaa. 857.717,50.-

3. Hoggaanka Isgaarsiinta Booliska oo qabanayey hawlaha isgaarsiinta ee gurmadka ayaa laga galay kharaj dhan. 50.000,00.-

4. Kharaj ay gashay Xoghaynta Guddiga Sare ee gurmadka kuna saabsan shidaal, raashin, xamaalid iyo socodsiinta hawlo sahan iyo kormeer ayaa ahaa. 150.552,25.-

5. Kharajyo dhowr ah oo ay Wasaaradda Beeruhu u gashay hawlaha gurmadka awgood ayaa kala ahaa sidan:

| | | |
|---|---|---|
| b) Kiro dayuurad sahan | Shso. | 80.000,00.- |
| t) Iib laba doonyood | Shso. | 100.245,56.- |
| j) Jawaanno | Shso. | 250.000,00.- |
| x) Shidaal | Shso. | 118.400,00.- |
| Wadar | | 548.645,56.- |

6. Degmooyinka Beledweyne, Jamaame, Jilib, Bu'aale iyo Baardheere, oo ay daadadku aad u waxyeelleeyeen ayaa, khasaare ahaan, hoos u dhaca dakhli ee ku yimid laguna qiimeeyey. 330.000,00.-



## Soo koobidda khasaarooyinkii iyo kharajyadii ka dhashay daadadka

Guddiga Qaranka ee Gurmadka Fatahaadda Webiyada iyo Roobabku, wuxuu aad ugu dadaalay in la ogaado inta uu dhan yahay khasaaraha ay daadadkii dalka gaarsiiyeen iyo inta uu dhammaa kharajkii ku baxay la dagaallankooda. Waxaase hubaal ah in labada midna aanu ku dhammayn qiimeyntan uu Guddigu soo diyaariyey: Khasaarooyin badan oo ay ka mid yihiin beero (dhir midhood, liin, cambe, babaay), xoolo iyo dhismaba ayaan la qiimeyn, taas oo ku imaanaysay in la yaraysto ama aanu Guddiga Qiimeyntu la kulmin. Kharajyo badan oo aanay cidiba diiwaan-gashan, ama looba qaadan in ay daadadkii dhaliyeen, ayaan iyana la soo qorin.

Khasaarooyinkii fatahaadda ee uu soo qiimeeyey Guddiga Qiimayntu waxay isku noqdeen Sh. So. 163.162.883,06.

Kharajkii ka hortagga iyo badbaadinta ee fatahaadda webiyada iyo roobabka oo ay galeen Gobolladii ay daadadku waxyeelleeyeen iyo Hay'adihii dawladda ee ku hawlanaa arrinta daadadku, uuna ka jawaabay Guddiga Sare, wuxuu dhan yahay Sh. So. 4.436.849,00.

Markii ay joogsadeen daadadku, ayaa waxaa loo baahday in si degdeg ah dib loogu soo nooleeyo waxyaalo badan oo ay daadadkii waxyeelleeyeen. Sidaa darteed, kharajka dib u samaynta degdegga ah, dalab ahaan, ee ay soo qorteen Hay'adaha Dawladda qaarkood, ayaa kala ahaa sidan:

— Wasaaradda Hawlaha Guud (dib u samaynta waddooyinka....) Sh. So. 74.000.000,00.

— Wasaaradda Beeraha (dib u samaynta keliyaalka, hilooyinka, carra-tuurkii webiyada....) Sh. So. 7.957.000,00.

— Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta (dib u samaynta dugsiyadii ay daadadkay waxyeelleeyeen....) Sh. So. 7.000.000,00.

## GARGAARKII GURMAD

Maajo 5dii, 1981kii, J.D.S., waxay ugu baaqday adduunweynaha oo idil in kaalmo degdeg ah lala soo gaaro dadkii ay daadadku waxyeelleeyeen. Waxay Soomaaliya aragtay in dad badan oo deggan goobaha ay ku burqadeen daadadku ay noloshoodu halis ku jirto, keli ahaanteedna aanay ku fillayn badbaadintooda iyo daryeelkooda.

Baaqaas, oo ay soo saartay Wasaaradda Arrimaha Dibeddu, waxaa lagu sheegay in sida keliya ee looga hortegi karo dhibaatada daadadkaas ay tahay in la isticmaalo diyaaradaha qumaatiga u kaca iyo doonyo yaryar, lana helo teendhooyin, busteyaal, cunto, shidaal, daawo iyo shaqaale caafimaad. Baaqu wuxuu sheegay in haddii aan kaalmo noocaas ah dhawr maalmood gudahooda lagu soo gaarsiin dadkaas ay daadadku waxyeelleeyeen ay halis geli doonto nolosha kumaan-kun qof oo deggan meelaha ay fatahaaddu ka dhacday.

Guddigii Qaranka ee Gurmadka Fatahaadda Webiyada iyo Roobabka, ayaa isla markii la dhisayba (Maajo 3dii 1981), bilaabay olole uu ummadda Soomaaliyeed iyo adduunkaba kaga dhaadhacsiinayey laxaad-weynida dhibaatada daadadka iyo darnaanta dhibaatada ay dhaliyeen.

Guddigu wuxuu si joogto ah ugu gudbin jiray Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Dadweynaha (ee Soomaaliya) wararka arrinta daadadka. Wuxuu Guddigu xog-warran ku saabsan arrinta daadadka siin jiray Diblomaasiyiinta dalalka dunida u jooga Soomaaliya iyo Wakiillada Ururrada Caalamiga ah u jooga Soomaaliya.





*Jaalle Cabdirisaaq M. Abubakar (Bidix) iyo Mr. Svennevik, Wakiilka UNDP oo ka wada xaajoonaya arrinta daadadka*

Guddiga Qaranka ee Gurmadku wuxuu diyaariyey safarro ay Danjirayaasha-dalalka dibedda iyo Weriyeyaasha adduunku ku soo indha-indheeyaan goobaha ay daadadku ku dhaceen. Safarradaa waxaa looga gol-lahaa in adduunka lagu dareensiiyo xaqiiqda iyo laxaadka dhibaatada ay daadadku gaarsiiyeen ummadda Soomaaliyeed.

Maajo 15dii, 1981, ayey kooxdii ugu horraysay Danjirayaasha u safrayey goobaha ay daadadku waxyeeleeyeen tageen Gobolka Jubbada Hoose, si ay xog-ogaal ugu noqdaan arrinta daadadka, kaddibna dalalkooda ugu gudbiyaan warar sugan oo arrintaa ku saabsan. Danjirayaashaasi waxay ahaayeen kuwa Masar, Maraykanka, Jarmalka galbeed iyo Talyaaniga. Waxaa danjirayaasha la socday Wakiillo ka kala socday Hay'adda Horumarinta Mashaariicda ee Qarammada Midoobay (UNDP), Suuqa Dhaqaalaha Yurub (EEC) iyo Hay'adda Qaxootiga ee Qarammada Midoobay (UNHCR).

Lix maalmood kaddib socdaalka hore ayaa haddana la diyaariyey socdaal Danjirayaal. Socdaalkan waxaa ka qayb galay danjirayaasha dalalka Nayjeeriya, Kiinya, Suudaan, Jamhuuriyadda Dadka Shiinaha, Iiraan, Turkiga, Jamhuuriyadda Jabuuti. Danjirayaasha waxaa sii raacay Wakiillo ka socday Laamaha Qarammada Midoobay.

Waxaa dalka Soomaaliya yimid wufuud u socotay in ay ogaadaan baaxadda dhibaatada daadadka ee waxyeellaysay dadka Soomaaliyeed. Maajo 15dii, 1981kii, isaga oo ka wakiil ah Guddoomiyaha Hay'adda Qaxootiga Adduunka, Paul Hartling, waxaa dalka Soomaaliya yimid Agaasimaha Qarammada Midoobay u qaabbilsan qaxootiga ee fadhigiisu yahay Jineefa (Gineva). Agaasimaha Waaxda Siyaasadda ee Jaamicadda Carabta, Hashaam Xabaab (Suuriya) ayaa isna yimid dalka.





*Jaalle Cabdirisaaq (bidix) oo uga xog warramaya Hashaam Xabaab arrinta daadadka*

Socdaalladaa xaqiiqo-raadiska ahaa waxaa ka soo if-baxay in arrinta daadadka waxyeelleeyey Soomaaliya ay tahay mid daran; meelo badan oo kala duwan ayaa arrinta daadadka lagaga tilmaamay in ay tahay «masiibo daad». Agaasimaha Hay'adda Qaxootiga ee Qarammada Midoobay, Dr. Maxieme Lepold Zolner (Benin), markii uu ku noqday Jineefa, wuxuu adduunka ugu baaqay, gaar ahaan Hay'a-daha Caalamiga ah, in gargaar degdeg ah lala gaaro dadka Soomaaliyeed ee ay daadadku waxyeelleeyeen.

Xoghayaha Guud ee Qarammada Midoobay Dr. Weld-heim, ayaa isna ka hadlay arrinta daadadka ku fatahay Soomaaliya. Xoghayaha Guud wuxuu ku tilmaamay daad-adka «kuwo waaweyn (major floods)». Wuxuu adduunka ugu baaqay in kaalmo dhaqaale si degdeg ah loo gaarsiiyo dadka ay daadadku waxyeelleeyeen. «Daadadku waxay halis ku hayaan nolosha dad badan, kuwaas oo aan weli la daadgu-rayn, waxayna si daran u xannibayaan u-gudbintii cuntada iyo kaalmada gargaarka ee kaleba». Dr. Weldheim ayaa ku sheegay hadal uu jeediyey.

Al-Shaadali Al-Quleybi, Xoghayaha Guud ee Jaam-acadda Carabta, ayaa Maajo 12dii, 1981kii u soo diray Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya, Jaalle Maxamed Siyaad Barre, dhambaal uu ku muujinayey in uu arrinta daadadka u arko in ay tahay mid daran. «waxaa na soo gaaray, xagga qarammada Midoobay, wararka xanuunka leh... kana dhashay daadadka ba'an iyo khasaar-ooyinka daran ee la xiriira», Xoghayaha Guud ayaa dham-baalkiisa ku yidhi.

Xoghayaha Guud, Al-Shaadali, wuxuu dhambaalkiisaa ku sheegay in uu ugu baaqay Wasiirrada Caafimaadka ee Carabta oo xilligaa ku kulansanaa Jineefa, in ay ka wada hadlaan arrinta daadadka waxyeelleeyey Soomaaliya.

Golaha Wasiirrada Carabtu waxay fadhigoodaa Jineefa ku gaareen go'aamo ay ku soo jeediyeen in caawimo degdeg ah loo diro Soomaalia, go'aannadaa oo ahaa:



1. Faridda Xafiiska Horumarinta eegidda dirid caawimo degdeg ah oo magaca Golaha Wasiirrada Caafimaadka carabta loogu diro Soomaaliya, caawimadaas oo laga bixinayo Sanduuqa Carabta ee Horumarinta Caafimaadka.
2. Ku dhiirrigelinta Wasiirrada Caafimaadka ee Carabta in Soomaaliya loo diro caawimo degdeg ah oo maaddi ama mid la arki karo ah.
3. Ayidaadda go'aanka mashruuca uu wafdiga Soomaaliya soo hor-dhigay fadhiga afar iyo soddonaad (34) ee Ururka Caafimaadka Adduunka, kaas oo uu ku dalba-nayo (wafdigu) in caawimo degdeg ah loo diro Soomaa-liya wakhtigaan.

Adduunweynaha markii laga ogaaday in Soomaaliya ay daadad laxaad lihi ku fataheen, dhibaato iyo halisina ay ka taagan tahay, ayey intii la saaxiibka ahayd gargaar degdeg ah u soo direen. gargarkaas waxa lagu bixinayey magaca dadka ay daadadku waxyeelleeyeen. Gargaarkaas waxay intiisa badani ahayd cunno (badiba diyaarsan), hu', iyo hoy (teendhooyin iyo qalab dhisme). Waxa intaa dheeraa waxy-aalo kale oo si degdeg ah loogu baahnaa sida doonyaha, daawooyin iyo takhtarrada.

Kaalmadii gurmad ee ugu horreysay ee dalka soo gaad-hay, una socotay dadka ay daadadku waxyeeleeyeen, waxay timid dhowr casha kaddib, baaqii Wasaaradda Arrimaha Dibedda. Waxaa ula soo horreeyey Ururka Dhaqaalaha Yurub; waxaa iyana aan waxba kala dambeyn dalalka Reer Galbeedka: Talyaaniga, Maraykanka, Ingiriiska iyo Jarmalka Galbeed. Gargaarka ay dalalkani bixiyaan cunno, qalab, daawo iyo lacagba waa lahaa.

Deeqda gurmad ee ugu faraha badnayd, una socotay dadka Soomaaliyeed ee ay daadku waxyeeleeyeen, waxay ka timid Dawladaha Carabta qaarkood: Muslinnimada ka sokow,

Soomaaliya waa dal ka mid ah Jaamicadda Carabta, sidaas darteed, ayey dalalka Carabtu xil gaar ah iskasaareen wax la qabashada Ummadda Soomaaliyeed, inkasta oo Liibiya iyo Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Dadka Yaman ay Soomaaliya isku xun yihiin caawimona aanay uga fadhiyin.

Dalalka Sacuudiga, Imaaraadka Carabta, Kuweyt iyo Suudaan ayaa ka mid ahaa Dawladaha Jaamicadda Carabta ee gargaarka gurmad ee laxaadka lahaa bixiyey. Deeqdaa ay dalalka Carbeed u fidiyeen Soomaaiya (dadka ay daadadku waxyeelleeyeen), oo aan yarayni, waxay isugu jirtay cunto, bustayaal, teendhooyin iyo daawooyin.

Laamaha Qarammada Midoobay ayaa iyana ka qayb qaatay u gargaarista dadka Soomaaliyeed ee ay daadadku waxyeeleeyeen.

Gargaarkaa loo soo dirayey dadka ay daadadku waxyeelleeyeen wuxuu ahaa mid si degdeg ah loogaga baahan yahay goobaha ay masiibada daadadku ka dhacday. Guddiga Qaranka ee Gurmadka Fatahaadda Webiyada iyo Roobabku, isagoo lahaa guddoomidda gargaarka una xilsaarnaa qaybintiisa, wuxuu isku dayey in wixii soo gaadhaba uu degdeg ugu gudbiyo goobaha lagu tabaaloobay, ee ay daadadku waxyeeleeyeen.


Guddiga Qaranka ee Gurmadka oo yeelan jiray shirar isdabajoog ah, waxaa la soo hor-dhigi jiray marba wixii gargaar ah ee yimaada; isla shirkaa ayaanuu go'aan kaga gaadhi jiray qaybinta waxa markaa la hor keenay.

Waxaa aad u adkayd sidii gargaarka loo gaadhsiin lahaa dadkii ay daadadku waxyeelleeyeen. Iyada oo aan gaadiid fiican oo dhul la haynin, ayey haddana jidadkii la mari lahaa daadad gooyeen. Dadka meelaha geeri-go'anka ah ku go'doomayey, una baahnaa in dayuurado, siiba kuwa qumaatiga u kaca, wax loogu geeyo, ayaan loo hayn. Dhowr jeer ayey diyaarado wax geeyeen meelaha loo gurmanayey,





*Jaalle Cabdirisaaq M. Abuubakar (Bidix) ayaa ka guddoomay Guddoomiyaha X.G.U.SH.S., Jaalle Cabdillaahi Maxamed Mire, deeqdii shaqaalaha*



Deeqdii loo fidiyey dadkii ay daadadku waxyeelleeyeen

waxayse ku daadinayeen garoommada magaalooyinka. Doonyo yaryar, oo aan qof xoog weyn wax badan ka qaad weyneyn, ayaa gargaarka lagaga tallaabinayey daadadka.

Meel kastaba ha ku go'doomeene ama ha ku guryo beeleene, wuxuu Guddiga Sare ee Gurmadku ku dadaalay, kuna guuleystay in aanay cidina arrinta daadadka awgeed, gaajo ugu dhiman, ama roob dusha ka hela iyo qadh-qadho aanay dilin, wax dad ah oo la yidhi daad baa qaaday oo ay ka baxsan kari waayeenna lama arag.

Gargaarka lagu badbaadinayey dadka ay daadadku waxyeelleeyeen ma ahayn ka dibedda oo keliya. Xukuumadda Soomaaliyeed ayaa cunto, hu' iyo hoyba wixii ay gaadhsiin karto siinaysay. Dadweynaha Soomaaliyeed, dibedda iyo gudahaba, ayaa isna si hagar la'aan ah u taakulaynayey walaalahooda tabaaloobay.

Hay'adaha dawladda qaarkood ayaa gargaar fiican u fidiyey dadkii ay daadadka waxyeelleeyeen. Ciidammada Auubta ayaa Guddiga Sare ee Fatahaadda ku wareejiyey lacag dhammayd Shso. 125.930,55. Xiriirka Guud ee Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed ayaa isna lacag dhan Shso. 3.600.786,67 (Saddex cisho mushaharkood) bixiyey.

«Arrintaas waxay ku muujiyeen Shaqaalaha Soomaaliyeed xilkasnimo qaran, xammaasad Shaqaalennimo iyo u danqasho bulsho, markay ugu horreyntiiba ku dhawaaqeen kuna yabooheen deeq lacageed iyo u diyaar garow shaqo ay kaga qeyb galeyaan ka hortagga iyo ka badbaadidda dhibaatadaas fataha ee saameysay Gobollada qaarkood», Jaalle G/Sare Cabdirisaaq Maxamuud Abuubakar, ayaa ku bogaadiyey Shaqaalaha Soomaaliyeed.

Deeqdii gurmad ee dibadda loona soo diray dadkii ay daadadku waxyeelleeyeen may noqon mid ku wada baxday dadkii loogu talo galay. Marka horeba gargaarka dibadda

bilowgiisu wuxuu ahaa mid soo gaaray mar socodkii daad-adkuba uu soo joogsanayey; badiba wuxuu yimid mar ay daadadkii joogsadeen. Dhibaatada daadadku waxay bilaab-atay Maarso 1981dii, gargaarka dibadduna wuxuu soo bilow-day Maajo 1981dii oo ahayd bishii ugu darrayd uuse badiba socodkii daadadku joogsaday dhamaadkeedi.

Haddaba, iyada oo ay meel yaalliin khasaarihii ay daad-adku dalka gaadhsiiyeen iyo kharajkii ku baxay la dagaallan-koodiiba, ayey Dawladda Soomaaliyeed gargaarkii gurmadka ee soo hadhay u habaysay sidan:

1. b)In wixii lacag ah loo furo «Xisaab socota», lagana bixiyo wixii deymo ahaa ee hore loogu yeeshay Guddiga Gurmadka oo aan la bixin, wixii soo hadhana loo kay-diyo ku talo galka dhibaatooyinka dabiicadda.

   t) In lacagta ay noogu deeqday Dawladda Jarmalka Galbeed, dhanna DM. 15 Milyan, qalabka dhismaha waddooyinka loogu soo iibsho Wasaaradda Haw-laha Guud.

2. In wixii cunno ah iyo alaabta kale oo aan kaydsami karin la gado, lacagta ka soo baxdana lagu shubo xisaab socotada aan soo sheegnay oo ku magacaaban «Kaydka ka hortagga dhibaatooyinka dabiicadda».

3. In qalabka keydsami kara oo dhan, sida Teendhooyinka, bustayaasha, doonyaha, iwm, ay si dhab ah u xannaan-ayso una kaydiso Wasaaradda Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Miyiga, si looguga hortago dhibaatooyinka dabiicadda laga fili karo.

4. In wixii daawo iyo qalab caafimaad ah lagu wareejiyo Wasaaradda Caafimaadka, laguna daryeelo dadwey-naha Soomaaliyeed.



5. Lacagta curaarta ka hor tagga dhibaatooyinka dabi-icadda loo meel dhigay waxa kaloo lagu bixin karaa, haddii laysla garto, kharajka dib u soo noolaynta waxy-aalihii ay daadadku dhibaatada gaarsiiyeen aadna u taabanayey bulsho-weynta Soomaaliyeed sida wad-dooyinka, buundooyinka, isbitaallada, dugsiayada iyo wax ka qabadka fatahaadda webiyadda.

## TALOOYIN

I. Iyadoo weli lala rafanaayo rafaadkii lagala kulmay fatahaaddii Webiyada iyo Roobabka Gugii 81dii, ayuu Gud-diga Sare ee Fatahaadda Webiyada iyo Roobabaku talooyin iyo tusaalooyin uga soo jeediyey Gobolladii Fatahaaddu saameysay, hababkii ka hortagga Fatahaadda Webiyada iyo Roobabaka dayrta 1981 sida la filan karay.

## TABAABULSHAYSIGA FATAHA WABIYADA XILLIGA DAYRTA


Iyadoo maskaxda lagu hayo in xilliga dayrta ay ka hartay muddo aad u yar, lana ogsoon yahay in xilligaas biyo badani webiyada ku soo dhacaan, waxaa aad looga cabsi qabaa fatah la mid ah kii gugan (1981) dhacay oo si sahlan u iman kara, marka laga eego xaaladda ay hadda Webiyadu ku sugan yihiin iyo raadadkii fatahii guga oo weli taagan.

Si taas looga tabaabulshaysto Guddigu wuxuu ku tali-nayaa in degdeg loogu dhaqaaqo talooyinka soo socda oo ula muuqda xalka ugu deg degsan uguna sahlan:-

b) In si degdeg ah loo xiro dhammaan faraha furan ee ka dhashay fatahii Guga kuwa jilicsanna la adkeeyo;

t) In si habsami ah loo carratuuro meelaha ay Webiyadu ka qarshubeen;

j) In Mashruuc Faanoole lagu adkeeyo in ay dede-jiyaan 10ka km. ee carro tuurka ah ee uga harsan



*Shir Sare, oo uu guddoomiye ka ahaa Madaxweyne Ku-Xigeenka Labaad ee J.D.S., Jaalle Kulmiye, oo lagu falanqaynayey dhibaatooyinkii ay ka tageen daadadku*

x) In faraha biyo bixinta wabiyada loo suubiyo baratooyaal meel kastoo ay ku yaalliin, si loo dheellitiro biyaha Wabiyada.

dhinaca midig ee webiga kaddibna laga sii wado halka ay ku ekeeyaan oo ah Manaane, lana gaarsiiyo meel ku habboon.

x) Si hawlaha kor ku xusani u hirgalaan waxaa loo baahan yahay in degmooyinka nawaaxigooda hawlahaas laga fulinayo si degdeg ah loo geeyo qalabka koos ku qoran:-

1. Baldoosarro;
2. Shidaal;
3. Jawaanno faaruq ah oo badan iyo silig;
4. Baabuur carrada daldala oo iska roge ah;

kh) In mas'uuliyiinta degmooyinka loo xilsaaro abaabulka iyo fulinta hawlahaas, Wasaaradda Beeruhuna hoggaamiso farsamaynta hawlahaas, hubisana habka loo fulinayo.

## TALOOYINKA GUUD EE LA XIRIIRA KA HORTAGGA FATAHA

b) In si joogto ah loo carro bixiyo Webiyada xilliga Jiilaalka.

t) In gooldaha qalloocoodu saameeyo jidadka laamiga ah (sida Tuulada Sheekh Cambuulo ee Degmada Jamaame) iyo kuwa kale ee khatarta keeni kara la toosiyo.

j) In la furo Webiyarow loona suubiyo baratooyo si looga faa'iideysto loona dhowro in uusan ku fatahin degaannada u dhow iyo Mashruuca Mareereey.

kh) In guud ahaan la sameeyo sahan si labada Wabi mid kasta loogu helo biyo shub guud.

d) In beeraleyda deggan webiyada jiinkooda, fatahaaddana halista u ah, laga raro lana dejiyo meel aan ka fogeyn dhulbeeroodkooda, loona jeexo kanaallo ay kaga maarmi karaan degannaanshaha webiyada jiinkooda.

r) In biyihii ka soo fatahay Mahaddey agteeda (Dudu-ble) socdayna ilaa Qoryooley ku dhowaadkeeda fiiro gaar ah loo yeesho, inkastoo laga yaabo in arrintaasi aanay sanooyin badan dhicin, lana qaado tallaabooyinka soo socda:-

1. In baratooyo loo sameeyo meesha biyuhu ka soo baxeen si marka loo baahdo loo furo.
2. In jidka Jawhar-Buulo-burde meesha ay biyuhu ka gooyeen lagu sameeyo buundo weyn oo kelligu hoos maro.
3. In kelligaas la sii bixiyo 5 ilaa 10 km. oo ku aaddan meesha biyuhu mareen.
4. In dhuuxa biyomareenka ee ay biyuhu mareen Guga 1981, magacyadooda lagu muujiyo maabka, Tuul-ooyinka dhuuxa biyomareenka degganna dhinacyada looga saaro degaan ahaan, hase yeeshee beeraha hal-kooda loo daayo.
5. In meesha biyahaasi ka gooyeen waddada laamiga ah ee Afgooye-Wanlaweyn loo sameeyo biyomareenno afkoodu weyn yahay.

s) Iyadoo la tixgelinayo dabiicadda gaar ahaaneed ee Gobollada Webiga Jubba maro oo marka roob da'o kala go'dooma, waxaa loo baahanyahay in lagu dadaalo sidii degmooyinka Gobolladaas loogu yeeli



lahaa awood isku fillaansho xilliyada ay go'doonka yihiin, xagga nolosha daruuriga ah sida caaf-imaadka, raashinka iyo shidaalka.

sh) In Gegooyinka Diyaaradaha ee hore uga jiray deg-mooyinka qaarkood dib loo hagaajiyo sida ta Dujuuma iyo ta Saakow, kuwa aan lahaynna loo sameeyo si haddii dhibaato dhacdo loogu soo gur-man karo.

dh) In la dedejiyo Mashruuca Buundada Jilib-Mareerrey si looga baxo dhibaatada isgaarsiinta ee taagan, loona baajiyo shidaalka faraha badan ee ku baxaya wareegga dheer.

c) Isu dheellitirid la'aanta biyaha webiga JUbba iyo dhibaatooyinka ka taagan waddooyinka Gobollada Webigu maro, waxaa mustaqbalka wax weyn ka tari doona Mashruuca Biyo-mareenka Markablay, hase yeeshee bacdamaa mashruucaas hirgelintiisu qaadanayso muddo dheer, waa in aan marna lala sugin wax ka qabadka arrimaha la xiriira ka tabaab-ulshaysiga fatahaadda ee kor ku xusan.

g) In wixii deeq ah ee gurmad ahaan loo helay inta keydsami karta la kaydiyo lana xannaaneeyo, si mustaqbalka looga faa'iideysto haddii ay dhacaan dhibaatooyin la mid ah tii fatahaadda oo kale.

f) In la sameeyo daraasad degdeg ah oo la xiriirta u tabaabulshaysiga masiibooyinka dabiiciga ah.

q) In daraasad iyo sahmin lagu sameeyo Farwaaley (Buuloburte iyo Jalalaqsi dhexdooda) si biyo xireen labaad ahaan loogu isticmaalo Webiga Shabeelle.

II. Shirkadda Sir M. Macdonald & Partners Limited ayaa arrinta daadadkii Gugii 1981dii warbixin ay ka qortay ku dartay talooyin muhiim ah. Talooyinkaas oo badiba ku saabsanaa kaalmaynta beeraleyda yar yar, hagaajinta waxyaalihii uu daadkii guga 1981du dhaawacay iyo ka tabaabulshaysiga daad dambe ayaa qaar ka mid ahi, badiba kuwii tabaabulshaysig, ahaayeen kuwan oo laga soo turjumay warbixintii Shirkadda ee rasmiga ahayd:-

1. In la hagaajiyo qalabka cabbiraadda webiga ee Luuq, Baardheere, Kaytoy, Jilib, Kamsuuma iyo Jamaame.
2. In la helo qalab la qaadi karo oo buundo gurmad loo isticmaalo mustaqbalka.
3. In qalab isgaarsiineed oo mar walba diyaar ah la dhigo Beledweyne, Buuloburde, Doolow, Luuq iyo Baardheere, si loogu qabto hawlaha digniinta degdegga ah ee daadadka.
4. In la hubiyo in xarumaha cabbiraadda webiga iyo roobka ay joogaan shaqaale joogta ahi.
5. In laga sameeyo daanta bidix ee webiga (marka loo jeedo xagga webigu u socdo) faro webiga lagaga neefiyo inta ka hooseysa Tuulada Iji si loo isticmaalo xilliga daad quwaddiisu ay ka badan tahay mugga webiga markuu marayo Mahadday Weyn (140m3/S).
6. In baaris lagu sameeyo dhulka bacaadka Jalalaqsi ee xagga bidix (marka loo jeedo xagga webigu u socdo) ka xiga webiga taas oo looga jeedo in gurmad ahaan loogu isticmaalo meel webiga lagaga neefiyo iyada oo faro laga furayo webiga kanaalana loo jeexayo.
7. In la sameeyo sahmin iyo daraasad lagu dhiso hab biyaha laga siidaayo labada dhinac ee webiga Jubba xaggiisa hoose, taa oo lagu hananayo biyo saarid degdeg ah, si loo yareeyo khasaaraha dalagyada.



8. In la sameeyo hay'ado dawli ah oo ku habboon ka shaqeynta labada webi, wada shaqeynta horumarinta khayraadka biyaha, isticmaalka biyaha iyo hawlaha xadidaadka daadadka.

## SHAXO

**Deeqdii dibadda iyo tii gudaha ee lacag ahaan u soo gaartey Guddiga Gurmadka Fatahaadda Webiyada iyo Roobabaka:**

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1. | Xiriirka Guud ee Ururrada Shaq. Soomaaliyeed | Sh. So. | 3150786/- |
| 2. | Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed | Sh. So. | 125930/55 |
| 3. | Dawladda Boqortooyada Sacuudiga | US$ | 5.000000 |
| 4. | Mu'tamarka Islaamka | US$ | 100.000 |
| 5. | Safaaradda Daw. Jabbaan ee joogta Khartuum | US$ | 10.000 |
| 6. | Dawladda Jarmalka Federaaliga ah | Mark | 15.000000* |
| 7. | Jaaliyadda Kuweyd | ~~K.D~~ US$ | ~~4.300000~~ 8.112.87 |

*Si toos ah ayaa loogu wareejiyey W.H/Guud si ay qalab ugu keensadaan.

## DHARKA IYO QALABKA DEEQ AHAANTA U SOO GAARAY GUDDIGA GURMADKA FATAHAADDA WEBIYADA IYO ROOBABKA EE LAGAGA HORTAGI KARO DHIBAATADA DABIICADDA

| Tr. | Dowladda | Nooca Bad. | Tirada | Guud | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 1. | Kuweyt | Teendho caadi ah | 500 | Xabbo | 5 | Xabbo |
| 2. | » | Buste | 18.458 | » | 461 | » |
| 3. | » | Go'yaal | 10.700 | » | 200 | » |
| 4. | Saudi Arabia | Teendho caadi ah | 2.000 | » | 1 | » |
| 5. | » | Darmo | 15.000 | » | 533 | » |
| 6. | » | Buste | 24.928 | » | 280 | » |
| 7. | » | Dhar daaqado | 2.000 | daaqad | 230 | daaqad |
| 8. | » | Sarawiil | 15.000 | xabbo | 6.666 | xabbo |
| 9. | Abu-Dabey | Teendho caadi ah | 1.868 | xabbo | — | |
| 10. | » | Buste | 1.944 | » | — | |
| 11. | » | Matoor dooni | 12 | » | — | |
| 12. | » | Doon | 24 | » | — | |
| 13. | Ingiriiska | Buste | 15.000 | » | — | |
| 14. | » | Darbaal | 92 | xirmo | — | |
| 15. | E.E.C. | Buste | 2.208 | xabbo | — | |
| 16. | » | Plaastic | 3 | duub | — | |
| 17. | Talyaani | Dhar kartoono | 74 | K/n | — | |
| 18. | » | Buste | 888 | xabbo | — | |



| Tr. | Dowladda | Nooca Badeecad. | Tirada | Guud | |
|---|---|---|---|---|---|
| 19. | Unijeef | Teendho Isbitaal | 4 | » | — |
| 20. | Jarmalka | Teendho caadi ah | 105 | xabbo | — |
| 21. | » | Buste | 9.959 | » | — |
| 22. | » | Palaastic | 660 | » | — |
| 23. | » | Muraale/Looxaan | 584 | » | — |
| 24. | » | Sariiro | 8 | » | — |
| 25. | » | Qalab yaryar ee farsamo oo isugu jira 24 nooc sida: dube, faas, miish. baaldi, xarig iwm. | 884 | » | — |

## SOO KOOBIDDA ISKU DARKA DHARKA IYO QALABKA KAYDSAMI KARA EE DEEQ AHAANTA U SOO GAARAY GUDDIGA GURMADKA FATAHAADDA WEBIYADA & ROOBABKA EE LAGAGA HORTAGI KARO DHIBAATADA DABIICADDA

| Tr. | Nooca Badeecadda | Tirada | Guud | Inta aan soo deg. ama xumaatay | |
|---|---|---|---|---|---|
| 1. | Dhar qaadado & K/n | 2.000 daa. & 74 K/n | | 230 | Daaqad |
| 2. | Saraawiil | 15.000 | xabbo | 6.666 | xabbo |
| 3. | Buste | 73.385 | » | 485 | » |
| 4. | Go'yaal | 10.700 | » | 200 | » |
| 5. | Teendho caadi ah | 4.473 | » | 6 | » |
| 6. | Darmo | 15.000 | » | 533 | » |
| 7. | Doon | 24 | » | — | » |
| 8. | Matoor doon | 12 | » | — | » |
| 9. | Darbaal | 92 | xirmo | — | |
| 10. | Balaastik | 663 | duub | — | |
| 11. | Sariiro | 8 | xabbo | — | |
| 12. | Muraale & looxaan | 584 | xabbo | — | |
| 13. | Teendho Isbitaal | 4 | » | — | |
| 14. | Qalab yar yar ee farsamo oo isugu jira 24 nooc sida: dube, faas, miinshaar, baaldi, xarig, kamadaarye feynuus iwm. | 885 | xabbo | — | |



## SHAXDA CULEYSKA CUNNADA, DAAWADA IYO QALABKA CAAFIMAADKA EE DEEQ AHAANTA U SOO GAARAY GUDDIGA GURMADKA FATAHAADDA WEBIYADA IYO ROOBABKA

| Tir. | Dowladda | Nooca Badeecadda | TiradaGuud Tan | Inta aan soo deg. ama xu. Tan |
|---|---|---|---|---|
| 1. | Kuweyt | Bariis | 877.425 | 17.687 |
| 2. | » | Bur | 1.000 — | 299.813 |
| 3. | » | Sonkor | 1.000 — | 98.550 |
| 4. | » | Digir | 427.848 | 37.300 |
| 5. | » | Hilib | 50.942 | 11.228 |
| 6. | » | Caano Boore | 60 — | 12.220 |
| 7. | » | Formaajo | 36 — | 9.220 |
| 8. | » | Lorado Milk | 85 — | — |
| 9. | » | Cream Milk | 41 — | — |
| 10. | » | Khudaar | 122.400 | — |
| 11. | » | Yaanyo | 126 — | 2.279 |
| 12. | » | Buskud | 27 — | — |
| 13. | » | Caleen shaah | 36.020 | — |
| 14. | » | Saliid/Subag | 96 — | 16.984 |
| 15. | » | Digir cas/cas | 137.500 | — |
| 16. | » | Dawo & qalab caafimaad | 16.064 | — |
| | | Isugeyn | 4,139.199 | 505.83 |
| 17. | Saudi Arabiya | Bariis | 270 — | 28.755 |
| 18. | » | Bur | 300 — | 22 — |
| 19. | » | Caano Boore | 43.200 | .076 |
| 20. | » | Saliid | 11.355 | — 590 |
| 21. | » | Sonkor | 150 — | 2.070 |
| | | Isugeyn | 774.555 | 53.491 |
| 22. | W.F.B. | Galley | 2.500 — | — |
| 23. | Ingiriiska | Hilib | 1.350 | — |

| Tr. | Dowladda | Nooca Badeecadda | TiradaGuud Tan | Inta aan soo deg.ama xu. Tan |
|---|---|---|---|---|
| 24. | Abu-Dhabey | Bur | 266.500 | 5.200 |
| 25. | » | Bariis | 191.250 | 1.305 |
| 26. | » | Daawo | 2.947 | —— |
| | | Isugeyn | 460.697 | 6.505 |
| 27. | E.E.C | Protain food | 2.200 | —— |
| 28. | » | Sonkor | 5 — | —— |
| 29. | » | Hilib | 3.300 | —— |
| 30. | » | Frut qalalan | 5 — | —— |
| 31. | » | Caano Boore | 10 — | —— |
| | | Isugeyn | 25.500 | —— |
| 32. | Talyaaniga | Sonkor | — 480 | —— |
| 33. | » | Buskud | 10.003 | —— |
| 34. | » | Caano | 2.700 | —— |
| 35. | » | Malmalaado | 1.224 | —— |
| 36. | » | Hilib | 5.712 | —— |
| | | Isugeyn | 20.119 | —— |
| 37. | U.S.A. | Hilib | 45 — | —— |
| 38. | Unijeef | Kaniini | .050 | —— |
| 39. | Suudaan | Daawo | 5 — | —— |
| | | Isugeyn Guud | 7,971.470 | 565.079 |